Collection Information:

Item: Somali transcript of oral history interview with Ahmed Mohamed Mohmoud, July 13, 2014. / Qoraalada asalka ah ee laga sameeyey wareysiyada afka Soomaaliga.

Collection: Somalis in Minnesota Oral History Project. Oral History Interviews of the Somalis in Minnesota Oral History Project.

Copyright Notice:

© 2016 Minnesota Historical Society

Researchers are liable for any infringement. For more information, visit www.mnhs.org/copyright.

Version 2
December 6, 2016

Ahmed M. Mohmoud
La wareyste

Ahmed Ismail Yusuf
Wareyste

Luulyo 13, 2014
Minneapolis, Minnesota

Qoraalada asalka ah ee laga sameeyey wareysiyada afka Soomaaliga[1]

Ahmed M. Mohmoud **-AM**
Ahmed Ismail Yusuf **-AY**

AY: Magacaygu waa Axmed Ismaaciil Yuusuf, maanta waxaan halkaan wareysigu ugu qabanayaa hay'ada la yiraa Minnesota Historical Society mashruuceeda la yiraa Oral Project. Halkan waxaa ila jooga oo i weheliya Axmed Maxamed Maxamud oo ah nin aan saaxiib nahay oo gabyaa af maal ah. Waxaa aan sameynaynaa wareysi aan isaga ka qaadi doono oo aan uga qaadi doono afka Soomaaliga wareysigaasna waa la qaban oo cajalad ayaa lagu duubi. Axmed ku soo dhawoow wareysiga.

AM: Waa mahadsan tahay.

AY: Hagaag, waxaad ii ga warantaa oo aad igu taabataa maalintii uu aabahaa dhashay? [qosol]

AM: Aabahay wuxuu dhahay lama xisaabin jirin taariikhda Soomaalida sida kuwa reer galbeedka.

AY: Waa gartay.

AM: Laakiin xiligii daraawiishtii buu dhashay oo lagu qiyaasayo 1917 kii meelahaas ilaa iyo 19 kii.

AY: Bisha waliba asagu xiligaas buu ku soo beegmoo labadaas sanadood uun baa ku jira wax mad madow ku jiro.

AM: Haa.

AY: Laakiin waa xili la garanayo.

AM: Haa.

[1] English translation is also available.

AY: Xagee buu ku dhashay?

AM: Wuxuu ku dhashay meel miyi ah.

AY: Oo magaalo xagee ugu dhaweyd?

AM: Anigu waxaan u malaynayaa magaalo Buuhoodle ayaa waxaa ugu dhaweyd.

AY: Miyiga laakiin meeshuu ku dhahay magaceeda ma garan?

AM: Waxay u malaynaa Horfahi soonkaas meel miyi ah uu bay ahayd.

AY: Bay ahayd.

AM: Haa.

AY: Miyaa aragtay dhulkaas?

AM: Dhulkaas waan wada maray waa arakay haa.

AY: Walee. Wow!

AM: Haa.

AY: Hooyana goormay dhalatay?

AM: Hooyaday ilaa shan sano Iyana way ka yareyd. Markaa 25 kii 5 sano ilaa 7 sano way ka yareyd. Ilaa 25 ki bay dhalatay qiyaastii.

AY: Xaga ku dhalatay?

AM: Waxay ku dhalatay meel Hargeysa duleedleeda ah.

AY: Oo miyiga Hargeysa ah.

AM: Oo miyiga hargeysa ah.

AY: Aabe waan soo gaaray waan arkay dhabtii ama runtii labadeenuba waliba eeda aniga ayaa iska leh baan u malaynayaa, taariikh badan buu ku fadhiyey isaga oo yar dagaalkii Sayid Maxamed Cabdille Hassan uu ku qaaday cid walba oo xitaa ay ku jireen qabiilada Soomaaliyeed, wuu ku dhaawacmay soo ma ahayn. Uur kuu ku jiray dhabtii miyaa?

AM: Wuu ku dhaawacmay inan yar buu ahaa oo hooyadii sinta ku siday.

AY: Oo sintay ku siday.

AM: Oo markaa xabadii hooyadii dishay. Haa, baa markaa isagana kalida kaga dhacdayoo o hal kali buu lahaa, boqol sanadood buu kali qura lahaa.

AY: Boqol jir miyuu ku dhintay?

AM: Qiyaastii ku dhawaad adigu haa, boqol maynan gaarin laakiiin wax yar baa ka dhimanaa, dhow sannadood.

AY: Wuxuu dhintay…

AM: 2011 kii.

AY: Ayuu halkan ku dhintay.

AM: Haa.

AY: Markaa taariikhdiisii waxaa ka mid ahaa in uu ka mid ahaa ciidamii Ingiriiska maxaa la oran jirey ciidamadii Ingiriiska ee uu ku biiray?

AM: Magacyo badan bay kala laayeen oo dee qaar "Komon kord" baa la oran jirey. Qaar ba si qaar "Soomaali Skoot" magacyo badan bay lahaayeen, laakiin asagu wuxuu ahaa kuwii dagaalkii labaad loo qaaday.

AY: Oo tagay halkuu markaa ka dagaalamay?

AM: Marka isaga waxaa laga qaaday markii hore halkaa uu ku dhashay baa laga qortay hor fadhi sidii uu ee sheegay. Markaa Hor fadhi markii laga qaaday waxaa la geeyey Mandeera. Halkaasaa lagu tababaray.

AY: Mardeeradii Kiiyna, mise Soomaaliya ee Barbara.

AM: Agteeda ahayd ee Waqooyiga ku taalay.

AY: Haaheey.

AM: Mandeera marka waa laga lugeysiiyey, tababarkii waxay ku dhameysteen lug ilaa Caruusa.

AY: Caruusa oo ah Tansaaniya.

AM: Tanzaaniya ayey ku taalaa, intaasay lugeeyeen ilaa dhowr bilood bay sii socdeen oo lugeynayeen oo meel walba sii mareen markay halkaa tageena maraakiib baa laga saarey

dekedaa weynee waxaa lagu soo celiyey markaa waxay u malaynayaa in dhinaca Mombasa lagu so celiyey. Dekadaa ayaa laga qaaday waxaa loo gudbiyey markaa ilaa Burma aaya la kaxeeyey. Hindiya dhulkaas oo dhan aakhirkii dagaalkii labaad wuxuu ugu dhamaaday Burma.

AY: Haa, miyaad ka haysaaa…

AM: Hada Myammar baa la yiraahdaa baan u malaynayaa.

AY: Myammar.

AM: Magacii waa laga bedelay baan u malaynayaa.

AY: Haa, haa, haa, Myamaar. Eeh. Mayaad haysaa wax dukumiinti ah, wax warqado ah oo u uka tagay, oo tusaya oo wuxuun ka tilmaamaya waxyaabahaas.

AM: Waxaa horta anigu waan yaraa barigii Soomaaliya waxaasi yaaleen.

AY: Haa.

AM: Laakiin een Hargeysa uun baa ugu war dambeysay alaabadiisii sharciyadiisii dukumantiiskii. Hada waxaan iney yaalaan u malayn mayo.

AY: Maya cid dan ka lehi ma jirto.

AM: Haa.

AY: Hooyo iyadu goormay dhimatay?

AM: Hooyo iyadana Alaha u naxariistee, waxay dhimatay 1984 tii waxaynka ku dhimatay shil gaaro oo sheikh ka dhacay, magaalada Sheekh.

AY: Oo ka dhacay halkaa.

AM: Haa.

AY: Hagaag, hagaag. Halkaa marka iminka sheekadii adigay kugu soo noqonaysaa. Adigu goormaad dhalatay?

AM: Anigu waxaan dhashay 1969 kii waxaan ku dhashay Hargeysa.

AY: Hargeysaad ku dhalatay?

AM: Haa.

AY: Eeh, markaa ma Hargeysaad ku kortay?

AM: Anigoo caruur ah, caruurtayada aniga ayaa ugu yaraa, inta kale oo dhami waa ku koreen laakiin anigu markaa anigoo wiil yar ah ayaanu guurnay. Waxaanu u guurnay xagaa iyo Buuhoodle, ka dibna waanu ka tagnayoo Kunfurta ayaanu sii aadnay, Xamar, wa xoogaabaanu Koofurta joognay waa ka soo noqonay adigu meel walba waa Jubooyinka, Shabeelooyinka, Waqooyiga oo meel walba leh iyo Mogadishu intaba.

AY: Waa kala baratay arlada.

AM: Intaasaan ku koray. [qosol]

AY: Markaa noloshaadii maxaa oran kartaa noloshaa caruurnimadu nolol side u eg bay ahayd. Ma nolol dhib soo martay bay ahayd iyo qaxar mise nolol dabacsan bay ahayd ii iminka markaad dib u eegtid aad macaansanaysid.

AM: Walaahi nolosha qof marba dhinaca laga eegay ku xiran tahay. Anigu markaa waxaan u haystay in ay nolol adag ahayd.

AY: Waan gartay.

AM: Laakiin, markaan dib u milicsaday nolol macaanoo raaxo badan ayey ahayd.

AY: Ayey ahayd.

AM: Gaar ahaan inamadu xoriyad badan haysteen, meeshay doonaan kubada ku soo cayaarayeen, meeshay doonaan soo dabaalanayeen, bandow uusan jirin saaxiibadaa aad iska raacayso, intaa doonto. Mar Badda mar Wabiga, kubada wax walba caruurnimo tii ugu wanaagsanayd baan ku haysanay barigaa anagu.

AY: Maxaadse ku oran lahayd markaan joogay waxaan u malaynayey xiligaa waxbaad kaa maqnaa waxbaad tabanaysay?

AM: Dee barigaan caruurta ahaa dee ma aanan ogeyn dhibaatadu waxa ay tahay laakiin markaan yare soo hanaqaaday…

AY: Haa.

AM: Ee noloshaa iska adkayd, guud ahaan wadanka oo dhan waxaa iska jirey abaaro, waxaa iska jirey colaado, waxaa iska jirey hanti yaraan markaa qof walba dadka wadanka wax soo geliyaa waxay ahaayeen dadka Carabaha u dhoofa.

AY: Haa, iyo dadki madaxda ahaa.

AM: Iyo dadkii madaxda ahaa, markaa waad hiyi kacaysaa inan yar markaad tahay oo labadaa midna aadan ku jirin cidina nooguma maqneyn Carabta qoyskayaga.

AY: Reerkoo dhan.

AM: Reerkoo dhan markaa dadka lacagaha loo soo diro ee markaa dharka cusub loo keeno ma anaan ku jirin.

AY: Haye.

AM: Markaad inan yar tahay oo dee aad soo hano qaado, adiga laftaadu waxaad oran naysaa walaahi adigu in aad baxdo oo aad wax ka qayb qaadato ood qoyskiina soo kiciso.

AY: Baad u baahan tahay.

AM: [qosol] Baad u baahan tahay baad is oronaysaa.

AY: Waan gartay.

AM: Markaas oo kale hiyi kacaasi waa uu jirey dhalinyaranimadii laakiin guud ahaan intii dee colaadaha ka horeeysay nolol wanaagsan bay ahayd aad iyo aad u wanaagsan.

AY: Xagaad iskuulka sare ku dhamaysatay?

AM: Waxaan iskuulka sare ku dhameeyey dugsiga sare ee Laas Caanood oo barigaa la oran jirey Ismaaciil Mire hada waxaa lo bixiyey Muuse Yuusuf.

AY: Muuse Yuusuf na muxuu ahaa taasi waa sheeko Soomaaliyeed cidina fahmi mayso.

AM: Muuse Yuusuf ragii abaabulay iskuulka in la dhiso…

AY: Buu ahaa.

AM: Buu ka mid ahaa.

AY: Ismaaciil Mire na gabay yahan buu ahaa.

AM: Daraawiishta buu ka mid ahaa abaan duulihii Daraawiishtuu ahaa isaguna.

AY: Oo Daraawiishtuu ka mid ahaa ciidamadii ina Abdulle Hassan buu ahaa. Ee gabaydiisu wali nool yihiin.

AM: Haa.

AY: Een markaa iskuulkii ka baxday, maxaad qabatay markaa?

AM: Dugsiga sare markaan ka baxay waa jirtay wax la oran jirey Shaqada Qaranka oo labo sano ah oo qof walba oo dugsiga sare ka baxa labo sano in uu wadanka u shaqeeyo ah.

AY: Waa gartay.

AM: Hablaha iyaga waxaa lagu qori jirey in ay macalimiin noqdaan.

AY: Waa gartay.

AM: Dugsiyada sare.

AY: Waa gartay.

AM: Yey wax ka dhigi jireen, wixii inamada ama wiilasha ah waxaa loo diri jirey tababar ciidan, waayo barigaa waxaa jirtay colaadii Itoobiya. Waxaan ka hadlayaa 85 tii baan ka baxay dugsiga sare marka '86-'87…

AY: Haa.

AM: Labadaas sano waxaan ku jiray wixii la oran jirey gurmadka Shaqada Qaranka gurmadkii.

AY: Halkee baad ka gashay gurmadkii markaa?

AM: Waxaan tababar ku qaatay meesha la yiraa Dalyare oo Laas Caanood aan ka fogeyn. Ka dibna waxaa naloo kala qaybiyey meelihii furumuhu ahaayeen, aniga Buuhoodle la igu qoray markaa.

AY: Oo beesha kama aad fogaan.

AM: Maya kama aanan fogaan.

AY: Haa, dabadeeto markii ay taasu ku dhamaatay.

AM: Taasi markii ay ii dhamaatay, waan soo baxnay markii gurmadkii dhamaaday, waxaa jiray waxa la yiraahdo imtixaankii Jaamacada loo geli jiray oo ardayda dugsiga sare oo dhan lagu soo xaroon jiray Mogdisho.

AY: Waa gartay.

AM: Markay soo dhameeyaan gurmadka. Sidii baan hadana Mogdisho ugu soo laabtay. Imtixaankii Jaamacadii baan galay ma aanan helin meesha musuqmaasuq badan baa jirtay.

AY: Uh.

AM: Markaa markii hore ma aanan helin, laakiin waxaan soo galay Mac'had kale oo la yiraa Mac'hadka Macalimiinta oo loo soo gaabiyo magaciisa TTI.

AY: Waa gartay.

AM: Mac'had Tababarka Macalimiinta oo afka qalaad lagu yiraa [Teachers' Training Institute].

AY: Haa.

AM: Kaa markii aan dhameeyey hadana Mac'hadkii kale ee waxbarashada caafimaadka kaana markii aan dhameeyey ayey qabtii dhacday. Waana shaqeynayey intaaba.

AY: Qabtii oo ahayd.

AM: Dagaalkii Xamar '91 kii.

AY: Markaa marka intaa aad iskuulka ku jirto, dagaaladatan iyo waxakan dhacaya intee baad kala socotay?

AM: Dagaalada dhacayey ee Waqooyiga waanu maqli jirnay markaa oo dee anaga nama soo gaarin oo ma anaan joogi. Xamar baanu joognay een dhibaatadu dadku dad isku wada qoys ah oo iska wada ehel ah bay ahaayeen.

AY: Bay ahaayeen.

AM: Labada dhanba waa laga barooran jirey. Ma garatay?

AY: Haa.

AM: Markaa intaa waanu maqlanay dhibaatada iyo colaada jirtay markaanu Xamar joognay. Hase yeeshee waxay toos anaga noo saameysay markay Xamar ka bilaabantay colaadu.

AY: Markaa ma weerarkii baa idinku bilaabmay mise waxaydun aragteen ineysan nabadu jirin oo meesha la isugu yimid?

AM: Mayee anigoo galab hurda.

AY: Iska hurda.

AM: Haa, oo aan wax weyniba jirin. Si fudud bay dee markii hore dee wax qarsoonaa ma jirin oo guuxu waa iska jiray ilaa Balcad iyo Jowhar iyo in ay wax ka dhacdhacayeen waa maqlayey.

AY: Haa.

AM: Laakiin hal marbay sidii folkaanadii goor galab ah u qaraxday iyadoo wax walba caadi iska soconayaan magaalada.

AY: Markii waxaa weeye 1990 kii mise waa 1989 kii xiligaasi, markaa?

AM: Mayee waa ’90 kii Deceembar aakhirkeedii ilaa iyo saasaan u malaynayaa haa.

AY: Waa huruday.

AM: Galabaa anoo hurdoo waxaaba maqlin baa ma aragtay digtii iyo dambtii meel waxoogaa cabaar noo jirta in door ah ayey noo jirtay runtii baan shanqadii maqalnay. Markaan soo toosay waxaan aragnay dad qaxaya oo dumar iyo caruura oo madaxa ku sita dharkoodii iyo waxaa.

AY: Xaafadee baad deganayd?

AM: Een waxaanu deganayd Hawl-wadaag.

AY: Marka intee bay idinku qaadatay in aad idina qaxii ka qayb qaadataan? Meeshii gurigii markaad hurdada ka kacday maxaa dhacay?

AM: Dhowr cisho labo sedex cisho ayaanu meeshii sii joognay, ka dibna dhinaca Madina ayaanu u sii guurnay een halkaana dhowr cisho ayaanu sii joognay ka dibna waanu soo baxnay oo waxaanu nimid Mareeray oo halkaa iyada laftigeeda aanu xiligaa ka hor ku noolaan jirnay. Mareeray ayaanu waxaanu deganayn mudo bil ah warshadii sokora meesheedii.

AY: Jowhar.

AM: Mayee warshadii sokorta ee Mareeray ee Jubada Hoose ku taala Jilib agteeda.

AY: Waa hagaag.

AM: Taasna bil markii aanu joognay waanu ka guurnay oo waxaan u guurnay dhinacaa Kismaanyo. Markaa Kismaanyo aniguu waxaan ahaa nin xirfada caafimaadka leh oo cudurada guud iyo caafimaadka ayaa tababarkaygu uu ku saabsanaa markaa isbitaalkaan ka shaqeyn jirey Burinti iskoorsadaan caawin jirney in badan waxaan ka shaqeyn jirney habeenkii heeganka.

AY: Kalmadaa ku celi ma Talyaani baa kalmadaasi?

AM: Waa imeejensiga, haa.

AY: Haa, hagaag.

AM: Gargaarka degdeg ah

AY: Gargaarka degdeg ah.

AM: Waa hagaag.

AY: Haa.

AM: Baan iyo dhaqtarkoo dhan baan ka shaqeynaynay, adigu ilaa sagaal bilaad ayaanu joognay meelahaas qiyaastii ku dhawaad. Ka dibna dagaalkii ayaa Kismaanyo laftigeedii soo gaaray.

AY: Uh-uuh.

AM: Markaana waxaan u soo qaxnay dhinaca xaduudka Kiinya meel u dhow oo la yiraahdo Dhooblay ama Libooyo la yiraahdaa. Labo Libooya ayaa dadku yiraahdaa Libooyo-Kiinya iyo Libooya-Soomaaliya.

AY: Haa.

AM: Laakiin magaceeda rasmiga ah Dhoobley baa la yiraahdaa xaga Soomaalida.

AY: Kalmadaa baaba ii korodhaye, een intii aydnaan laakiin gaarin xaduudka laftirkeeda, dagaalku intii u soconayey, waxyaabihii kuugu foosha xumaa ee aad aragtay maxaa ka mid ahaa?

AM: Dagaalku horta ilaa intaan Xamar joogay dagaalku si rasmi ah meel xabadu ka dhacayso ma aanan tagin.

AY: Uh-uuh.

AM: Run baa wanaagsan.

AY: Waan gartay.

AM: Een macnihii markaan Kismaanyo nimid, waxaa aniga iigu taabasho badnayd dadka la keeno ee dhaawaca ah isku si baan u daweyn jirnay hadii aan qolyahayga xirfadleyaasha caafimaadka aan nahay.

AY: Waa gartay.

AM: Dhaqaatiirta iyo ma aragatay kalkaaliyeyaasha iyo kuligayo ma aragtay.

AY: Haa.

AM: Isku si baanu u daweyn jirnay.

AY: Waa gartay.

AM: Dadka maxaabiista ah ee la soo qabto iyo kuwii kale ee dagaalamayey ee dhinacan ka sii jeeday. Markii dhaawaca la keeno. Markaa waxaa aniga iigu dhib badnayd, habeen baa waxaa heegankaan lahaa meesha gargaarka deg dega ah, waxaa la keenay dhaawac aad u badan waxaa ku jiray labo nin oo dhaawac ah.

AY: Waa gartay.

AM: Oo la soo qabtay oo iyaga maxaabiis ahaan loo soo qabtay. Nimankii baanu ka shaqeynay, anagoo nimankii markaa daweynay. Baa waxaa noo yimi labo nin oo qoryo sita.

AY: Waa gartay.

AM: Waxay damceen nimankii in ay la baxaan.

AY: Waa gartay.

AM: Waan diiday marka ma kaxaynaysaan baan ku iri.

AY: Waa gartay. Ma garanaysaa kuwa qoryaha sita?

AM: Markaa may.

AY: Waa gartay.

AM: Laakiin kolkayba waxay ahaayeen niman dadkii halkan ka duulayey ah. Bay ahaayeen. Ka dibna waxay noqotay in ay ii hanjabaan oo anigii qoryihii iila soo baxaan.

AY: Haaheey.

AM: I dila baan ku iri marka hore ma soconayso, dee inan yarna waan ahaa runtii oo teestestaroonkayga aniga laftiisu ma yareyn.

AY: Ma baqaysaa oo waxaad ku dhagan tahay mawqifkaaga?

AM: Labada nin rag Soomaali ah weeye. Waa la soo qabtay, markaa aniga naftaydu nimankii sheekadii waa u bedelay oo qabyaalad bay ku socdeen aniguna waa u yare qabyaaladeeyayoo xage kalaan u rogayoo waxaan ku iri ragii soo qabsaday ma tihidin, niman baa ii dhiibtay nimanka.

AY: Nimanka markaa la doonayo ee meesha ku jiraa, labada nine e dhaawaca ahi waa ayo?

AM: Waa Hawiye ayey ahaayeen labada nin.

AY: Kuwa daba socdaana.

AM: Daarood uu bay ahaayeen. Haa markaa.

AY: Markaa qaybtee baa Daaroodka kuu keenay?

AM: Ma garanayn cidii ii keentay kuwa bool xoof ah bay ahaayeen.

AY: [qosol] Waad iska sameysatay.

AM: Iyagaan isaga ridyey mooyaan.

AY: Haa.

AM: Kuwii keenay xataa ma garanayn.

AY: Ma ku garanayeen in aad adigu Daarood tahay?

AM: Kolkay way i tuhmi karayeen laakiin mid baa markaa i dharbaaxay ka dibna meeshii waxoogaa shoobaraa ka dhacay dagaal kale ma ahee waa la isku qamaamay ka dibna aakhirkii waxay noqoatay in nimankii ay tagaan labadii nin.

AY: Waa gartay.

AM: Markaa aniga taas uu baa iigu weynayd wax handadaad ah oo shakhsiyan igu timaada. Ee ma u malaynayo in ay khatar naftaydu gashay markaan daacad ahaan dib u fiiriyo, laakiin waxay ahayd uun isku day in nimankaas la dhaco oo la laayo bay ahayd. Al-xamdu lilaah ilaahay waa badbaadiyey een rag Soomaaliyeed oo Muslimiin ah ayey ahaayeen oo badbaaday uun ma aragtay ilaahay baa badbaadiyey subxaana laahu watacaalaa.

AY: Een ma niman darago leh bay ahaayeen mise shicib bay ahaayeen?

AM: May niman darajo leh ma aheyn, ma ahayn waad kala garan kartaa qofka sarkaalka ah iyo xitaa qaabka ay u hadlayaan iyo qaabka ay u labisan yihiin iyo niman waxay iska ahaayeen caadi yoo Soomaali ah dee.

AY: Magacyadoodii iyo ma xasuusan tahay? Hadaadse maanta aragato ma garan lahayd?

AM: May may ma xasuusna karo.

AY: Meelay ku dambeeyeen war kama haysid, ma bogsadeen?

AM: Waan ka war hayaa in yar markii la joogay mudo kooban la sii joogay. Horta nimankii waxaa la geeyey meesha xabsigaa la geeyey.

AY: Waa gartay.

AM: Markii dhaqtarkii la daaweeyey ee ay ladnaadeen xabsigaa la geeyey.

AY: Uh.

AM: Ka dibna waxaa lagu wareejiyey nimankii ee markii ay qoladii halkan joogay ay ka baxayeen.

AY: Haa.

AM: Ee Caydiid soo galayey.

AY: Haa.

AM: Waxaa lagu wareejiyey, waa la fasaxay kuligood waa la fasaxay, waxaa lagu wareejiyey marki ihore qoladii Al-tixaad. Al-itixaad ayaa iyaduna meesha joogtay Al-itxiaad Islaami.

AY: Uh.

AM: Waxaa jiray saldhig la oran jirey 43 aad.

AY: Uh.

AM: Gaaska 43 aad oo Kismaayo ku ooli jiray xiligii dowladii jirtay.

AY: Uh.

AM: Halkaasay deganaayeen. Waa Ibraahim Afhganigii maalintii dhawayd la dilayey baa ma aragtay ee reer Waqooyiga ahaa baa wuxuu ahaa nin dhawaan in aad maqashay ma aqaane Baraawe lagu dilay.

AY: Haa.

AM: Ninkaasaa abaabulay saldhiga marka adigu nimankaasaa lagu wareejiyey Al-itixaad ka dibna waa la sii daayey oo lagaga baxay magaaladii o iyagii baa magaaladii ku haray.

AY: Kaligood baa ku haray. Een, maxaa socdaalka kuugu xigay kee buu ahaa? Libooyo waa markaad imaanaysaan.

AM: Libooyo waxaa ka horeeyey wax la yiraahdo Habaar-waalid.

AY: Habaar-Waalid.

AM: Wado meesha ku taala waa dhar keyn jiq ah meesha Kismaanyo iyo xaduudka u dhaxeeysa ilaa 200 Liiloo Mitir.

AY: Haa, waa kayn.

AM: Marka waxaa jira waa xili roobaad dhulku sidaa jiq weeye, ma aha xataa waa dhul Amazon ka oo kale ah kaymo leh meel qofku uu maraa ay ciriiri ku tahay. Markaa wadada Kismaanyo ka soo baxda ee Kiinya soo aada ee waa wado yar oo baabuurta qaadka iyo mala waxaas loogu tala galay baacmushtarka xoogiisu wuxuu ka wareegi jirey Buulo Haawo, Balad Xaawo dhinacaas shishuu maraa, laakiin halkan ma aragtay waxaa mari jirey waxaan u malaynayaa in la igu yiri nin Jaamac Buluug la yiraahdo ayaa sameeyey.

AY: Maxaa la oran jirey?

AM: Jaamac Buluug.

AY: Haa.

AM: Haa wadadaas iney ka horeeysayna waa laga yaabaa, iney iska sheeko kale tahayna waa suurto gal. Wado aad iyo aad u ciriir ah weeye wadada la yiraahdaa Habaar-Waalid. Markaa Baabuurtu markay ka baxday Kismaanyo ilaa dee waxaan caqligaagaasi keenayn. Oo baabuur ah.

AY: Haa.

AM: Baa hal mar wadadii martay, wadaduna waxay ahayd wado aan laami ahayn oo dhoobo ah marka baabuurtu way ku lumbanayeen, roob xun baa da'yey oo aad u weyn marka meeshaa 200 kiiloo mitir oo dee hadii ay ciidu qalalantahay mudo kooban laga yaabaa in ay ahaan lahayd waxay qaadatay dhowr cisho ilaa sedex cisho afar cisho dadka qaarba in bay ku qaadatay iney gaaraan dadka baabuurta watay. Waxaa laga yaabaa baabuurkii ku sii dhow adigu halkaa ma aad marin baan u malaynayaa Osingu meesha xaduudka Kiinya laga galo. Iney ilaa 40 kiiloo mitir baabuurtu sanka isku hayso oo saa u taxan tahay sida kuwa samxada ee aad aragtay ee Haywayga.

AY: Haa.

AM: Baa lagu wada yimi. Habaar-waalid ka waxaa ugu dhib badnaa ma aragtay qaabka loo soconayey sedexdaa afartaa maalmood.

AY: Xiliguna wuxuu ahaa xiligii uu cirku dihin yahay?

AM: Haa, haa roob baa jirey weyn dhulku wada dhoobuu ahaa.

AY: Bishee bay ahayd?

AM: Ninyahow bisha waxaa u malaynayaa iney…

AY: Oo xiligee bay ahayd?

AM: Kolkay xili Gu ah ahayd.

AY: Gu' bay ahayd.

AM: Haa, ma garan karo bisha saxda ah bishay ahayd ma garan karo.

AY: Haa, waa run Gu' bay ahayd.

AM: Haa, bacdal Ramadaan bay ahayd, dee Ramadaanka markii laga soo doogay wax saas ah ka dib laga baxay markaa dhirtaas ayey baabuurtu wadadu maadaama ay tahay mid yar oo ciriir ah oo isku qulqul ah.

AY: Haa.

AM: Gaarigu sidii uu u socdo qofkii baabuurta xaga sare ka saaran waxaa kula haraya dhirtaas.

AY: Geed.

AM: Haa, adigoo ay saa kuu xagteenoo oo ma aragtay dhib iyo rafaad, dhibtaas waxa ugu weyneyd waxaas uu baa ka mid ahaa.

AY: Marka markaas qaxaaasi dhacayey ee sidaa loo fakanayey ee loo yaacayey waa markii ay ciidamadii Maxamed Faarax Caydiid…

AM: Ay soo galayeen weeye.

AY: Ay soo galayeen weeye.

AM: Haa

AY: Dadka yaacaya markaas inta yaacaysa ee Habaar-Waalid saarani ma reer bay u badan yihiin mise cid walba way leeyihiin?

AM: Waxaan oron karaa dadka badankiisu waxay u badnaayeen reer bay u badnaayeen, dadkii markii horena Xamar ka soo qaxay hadana Kismaanyo ka sii qaxayey bay adigu u badnaayeen, laakiin dad badan oo kalena dee waa la socdeen.

AY: Dad kalena way la socdeen.

AM: Haa.

AY: Laakiin markaa dadka intaas qaxayey ee reer ahaan loo baacsanayey Daarood bay ahaayeen?

AM: Haa, dadkaas bay u badnaayeen.

AY: Een intii aad jidka mareyseen dhirtaas iyada lafigeeda maxaa raacsanaa, taasiba way dhib badan tahay laakiin dad miyaa jirey jidka lagu laayey? Dumar miyaa jirey fooli meesha ku qabatay?

AM: Dabcan way wada imanayaan, laakiin waan kuu yare sheeko dhaafay, intii aan Kismaanyo joognay anagu waxa aanu ahayn reer isku jir ah. Waxaanu ahayn Daarood iyo Isaaq wada qaxaya baanu ahayn.

AY: Macnaha qoyskiinu bay?

AM: Qoyskayagu.

AY: Waa gartay.

AM: Baanu ahayn.

AY: Waa gartay.

AM: Waxaanu ku soo dagnay Kismaanyo reer Hawiye ah dadka aanu ka soo qaxnayna Hawiyey ahaayeen, reer baadi cadde ah baanu ku soo degnay oo qaraabo nahay.

AY: [qosol] Cajiin Soomaalidu…

AM: Iyagaa na soo dhaweeyey.

AY: Iney sidaa ay sheekadu u socoto ee dagaalku u socdana inuu Isaaq idin la socdana maba ay ahayn.

AM: Haa.

AY: In Hawiye idin soo dhaweeyana ma ahayn.

AM: [qosol] Haa, reeekaanu ku soo degnay gurigooda degnay…

AY: Haa.

AM: Een na soo dhaweeyey reer aanu qaraabo nahay oo waxay ahaayeen reerkaas ah. Oo meeshaba iska degan.

AY: Waligoodba deganaaba. Meesha dhan oo ay xataa ugu yimaadeen dadkii kale ee Daaroodka ahaa ee ku soo qaxayaan wali iska degan.

AM: Haa, markaa meesha la yiraahdo Kismaanyo qabyaaladu dee dadkii hora deganaa oo reer Ksimaanyoodka ahaa oo nooc walba leh.

AY: Haa.

AM: Wax kala qaxay oo badan, waxaa laga yaabaa dad iney baxeen waanba ogaa qaar baxay oo dee dhalinyaro aanu saaxiib ahayn oon Xamar iska soo raacnay oo Hawiye ah inaanu ma aragtaa ay noqdeen oo halkan iney markii hore yimaadeen ay hadana dib u noqdeen oo Xamar ku noqdeen waa jirtay laakiin dadka deegaanka ahaa…

AY: Xamar ku noqday macnaha ka qayb qaateen dagaalkii iyagu?

AM: May, may may, dhalinyaray iska ahaayeen oo dee nin walba qoyskiisii waa la isa soo raacay.

AY: Haa, hagaag.

AM: Waxaa nala socday nin Abgaal ah oo gabar aanu ilmo abti nahay qaba.

AY: Oo dadka qaxaya ku jira.

AM: Oo qaxaya baa nala socda waxaa waxaan ku tusayaa siday ummadu u wareersan tahay ma og tahay.

AY: Yaah, cajiib.

AM: Maxamuud, Allaha u naxatiisto imanka Hargeysa ayuu ku dhintay ma garatay. Maxamuud baa nala socda.

AY: Hada iskiis buu u dhintay, dar Alluu u dhintay.

AM: Dar Alluu u dhintay haa, wali reerkiisii oo dhan iyo walaalkii reerkoodii oo dhami iminka Hargeysay degan yihiin, een Maxamuud oo Abgaal ah baa nala socda, dee ilmo abtiyaday, dumaashiday, dad badan oo Isaaq oo ilaa aad u badan oo ilaa 8 qof ah oo Isaaq ahina waa nala socdeen qoyskayaga. Marka waxaanu ahayn reer isku dhafan.

AY: Isa sita.

AM: Haa, markaa qaybta ugu wanaagsani waxay ahayd reerkii aanu na soo dhaweeyey dee si wanaagsan bay noo soo dhaweeyeen, laakiin magaaladii maadaama ay colaadii ay markii dambe sii kululaatay, anaga lafayadii waxaanu noqonay dad reerkii ilaaaliya aanu ku soo degnay.

AY: Haa, waayo dee colaad baa meeshi jirtoo oo iyagu ama eed ha lahaadeen ama yeysan lahaanine.

AM: Dad wax ma garato ah baa laga yaabaa iney wax yeelaan.

AY: Oo haybta ku yeelaan.

AM: Oo hayb qabiil wax ku yeelaan. Kii aanu la soconayna iyagaa na soo dhaweeyey.

AY: Sheekooyinkeenu waa sheekooyin cajiib ah.

AM: Markaa waxaa ka mid ah waxyaabaha ee waalida Soomaalida.

AY: Haa.

AM: Siday isu kala xigto isuma taqaan.

AY: Haa.

AM: Kalmadaa anigu ma aanan orane nin hora yiri oo Xamar wuxuu ahaa nin reer Buuhoodle ah oo adigu aan u malaynayo in uu dadkii madaxda ahaan jirey ahaa.

AY: Haa.

AM: Baa colaado Waqooyiga ka bilaabmay bay malaha u yimaadeen kuwo uu adeero u yahay iyo waxaa oo gurigiisii la yiri ha lagu shiro.

AY: Haa.

AM: Inan yaroo Isaaq ah ah oo uu abti u ahaa.

AY: Haa.

AM: Yey yiraahdeen waanu ku shireynaaye yaanu ina maqline naga dir inanka waxa aanu ka hadlaynee.

AY: Waana inankuu Abtiga u ahaa ee walaashii dhashay?

AM: Haa, iskuulkuuba ku hayaayoo isaguu ka jecel yahay.

AY: Haa.

AM: Wuxuu yiri waar kan diri maayee wax kale ii sheega, waar dee mayee sirtuu naga qaadayaaye naga dir.

AY: Naga kaxee.

AM: Haa. Nin weyn baa tahoo gurigaagaanu kuugu nimide. Wuxuu yiri adeer Soomaalidu, siday isu kala xigto isuma taqaan, ninkan…

AY: Haa.

AM: Guriga cid walba isagaa ka xiga buu yiri.

AY: Haa, waa gartay haa cajiib.

AM: Marka dee tii baan xasuustay, ninkii Soomaalidu siday isu kala xigto isuma taqaan.

AY: Een markaa socodkaas kama dambaystii waxaad ku gasheen.

AM: Haa, Kiinya xaduudkaanu tagnay meesha la yiraa Dhoobley halkaasaanu in muddo badan ah deganeyn. Qoyskaygu anigu markaa markiiba geed baanu sameynay dadkii dhaawaca ahaa ee la soo qaaday.

AY: Haa.

AM: Ee aynu mas'uulka ka aheyn Kismaanyo.

AY: Haa, qaar baadba sidataan.

AM: Mayee waaba sidanaaba kuli, reer walba qof waliba ninkiisii buu soo qaatay.

AY: Gabigaba.

AM: Haa. Nafar lagamaba imaan.

AY: Waa gartay.

AM: Ee markaa meeshii dhir baa la waabay, dhaawacii baan hadana halkii baan shaqadii ka sii bilownay, dhaqtar baanu meeshii ka sameynay dhir hoosteed ah.

AY: Geed hoostiisa.

AM: Haa.

AY: Geed hiistiis.

AM: Haa. Geed hoostiis, quracyo waaweyn bay meeshu leedahay, waxay ku ladnayd ninyahow meesha waxaa ku yaalay afar ceel biyood oo riigag ah way yarayad tuulada Dhooblay. Iyo sedex ma aqaan miday ahayd.

AY: Ceelal biyood.

AM: Ceelal biyo ah oo riigag ah o saa u duulayey lahayd.

AY: Haa.

AM: Markaa saasaa loo kala dagay meeshu waxay noqotay in kasto ay dhinaca Soomaaliya tahay hadana waxay noqotay tuulo yar bay markii hore ahayd magaalo weyn bay noqotay.

AY: Markii dadkii ku soo qaxay.

AM: Markii Kismaanyo badankeedii meesha ku dul degtay.

AY: Haa ku soo qaxday.

AM: Markaa anigu halkaa geedkaas baan joogayoo oo dadka ku daweyn jirey dadkaan dhiiga dad badan oo dhiig la'aan ama anemic ah ayaa jirey dadkaan wax la yiraahdo Dhiig ku Shubid ku sameyn jirey.

AY: Sidaa usameyn jirteen miyaa qalab u haysateen?

AM: Haa, qalabku waa sahal wax weynba uma baahna.

AY: In kastoo aynaan baari jirin qofku wuxuu qabo iyo waxaa.

AM: Haa.

AY: Xanuuno ku qabaa waxaa laga yaabaa in aad ugu qaado qof go'aya dee naftii baa gureysa.

AM: Dhaawacyada markaa idiin yaalay. Markaa…

AY: Cusbitaalka.

AM: Haa kuwa markaa cusbitaalkan aad geedka ka hoos sameysateen, dhaawaca idiin yaala ee dadka dhaawaca ah ee idiin yaala.

AY: Haa.

AY: Waa maxay dhaawaca ku yaalaa intuu le'eg yahay?

AM: Walaahi walaal dee waa dad xabadi ku soo wada dhacday bay ahaayeen uun, soo ma aad garan. Dad xanuunsaday waa jiraan gabdho umulay waa jireen dee waad garanaysaa xanuunadii caaadiga ahaa waxaa ka darnaa kuwa xabada.

AY: Kuwa xabadaha.

AM: Haa nabarada ah ee la dhayayo ee la tolayo ee faleembo la siinayo ee shaqo weyn bay ahayd.

AY: Shaqo weyn bay ahayd.

AM: Haa.

AY: Intaad joogay meeshaa?

AM: Markaa reerkayagu wuxuu u gudbay dhinaca Kiinya muddo kooban dhinaca Libooyo xerada qaxootigii galay. Oo ma aragtay ilaa 30 kiiloo mitir u jirta dhinaca shishe. Libooyo xaduudu kuma taalo xaduudu ma saarna dhinaca Kiinyada, magaalada Soomaaliya ayaa saran xaduudka.

AY: Hagaag.

AM: Tan Kiinya way ka yare go'an tahay, waxaan u malaynayaa 17 kiiloo mitir qiyaastii iney tahay.

AY: Bay u jirtaa.

AM: Dhowr iyo toban Kiiloo Mitir.

AY: Waa gartay.

AM: Markaa xagaasay degeen ee xerada qaxootiga ee ay hay'adahu joogeen ee dadka laga caawinayey ayey tageen, laakiin anigu meshaan ku haray, halkii baan joogay ilaa sedex bilood oo kale oo dadkii u sii shaqeynayey.

AY: Adigu shaqada dadkaas u shaqeynayso daraadeed baad u hadhay?

AM: Haa.

AY: Waa gartay.

AM: Ka dibna nin aanu saaxiib ahayn oo aan caafimaadka isla barangay Xamar markaanu joognay ayaa fariin ii soo direy oo igu yiri ninyahow shaqaan ku hayaa ee markaa waxaa jira Caafimaadka Guud. Maadaama aad baratay cid Caafimaadka Guud ahna aysan meeshii joogin.

AY: Haa.

AM: Dee badankiisii halkaanuu soo galay waxaa lagaaga baahan yahay in aad caawiso.

AY: Waa gartay, waa dhinaca kale ee reerkiinu degan yahay.

AM: Haa, waa dhinaca Kiinya, markaa waa kan yare caga jiiday in muddo ah baan halkii iska sii joogay, hadana way ka fursan wayday in aad xagi shishe u gudbo. Markii ninkii wuxuu iskaayo baray nin Mareykan ah o halkan Jooga oo iminka aan saaxiib noqonay.

AY: Oo wali halkan jooga.

AM: Fargo uu jogaa.

AY: Haye, oo ka shaqenayey meeshaa.

AM: Oo loo keenay qolyaha Caafimaadka Guud inuu caawiyo oo mashruucaba in u isku duba rido.

AY: Loo keenay.

AM: Magaaladu siday u kala degayso, biyo gelinta wax kasta oo ku leg leh Caafimaadka Guud ee bulshada.

AY: Uu u shaqeynayey markaa?

AM: Wuxuu u shaqeynayey hay'ad la yiraa CARE.

AY: Oh, CARE bus u shaqenayey.

AM: Markaa la yiraa Herbert Ludwig, Ludwig.

AY: Magaciisa awoowaha side loo hikaadiyaa?

AM: L-U-D-W-I-K, Ludwik, W-I-K.

AY: Waa hagaag.

AM: Herbert baa la iskaayo baaray waxaan imid dhinacii caafimaadka cisbitaalku uu ku yaalay. Xafiis baa la I siiyey markaa.

AY: In yar aan kaa dhex galo markaa labada dhinacba markaa waxaa sahayda siinaya ama cunto iyo waxay doonaysaba ha ahaatee waxaa weeye ha'adahaas sama-falka?

AM: Haa, waa hay'adahaas UNHCR ka waxaa ka hoos shaqeynayey hay'ado yar yar oo kale MRF iyo CARE iyo hay'ado yar yar oo sidaas ah Laan Qayrta cas iyo waxu meesha waa markii la cusbaa. Waa la soo degay marki idambe xog badan kama hayo.

AY: Haa.

AM: Xiligaa markaa dhakhtar yar oo teendhooyin ah baa jiray dhakhtarkii baan ku soo biiray, waxaa la ii sameeyey xafiis yar oo teendho ah oo aan anigu leeyahay markaa.

AY: Xerada.

AM: Xerada haa, waaba xafiiskii iigu horeeyey teendhaba na noqdee, kii hore ee xagaa aanu joognay mid gooni ah ma aanu lahayn ah ee dadka Caafimaadka Guud iyo caafimaadka waxoo dhami waa isku wada dhex jireen.

AY: Haa.

AM: Markaa een halkaasaan shaqadii ka bilaabay ninkaas aniga uun kaliya baa wax Caafimaadka Guud ah la shaqeeynayey.

AY: Waa gartay.

AM: Dadka dejintooda iyo waxa la yiraa Caafimaadka Guud, yaah biyaha qaabka loo galinayo biyaha, qaabka la isaga ilaalinayo xanuunada faafa inta badan waxa dadka laayaa ma aha xabada lagu laayey waxa ugu weyni waa xanuunada ka dhasha saxo la'aanta.

AY: Uh, uh.

AM: Qaxooti iyo saxo xumo way wada dhasheen, dadku mar haday qaxaan…

AY: Haa.

AM: Oo aanay musqulo hagaagsan haysan, biyo qasabadood oo la cabayaa jirin.

AY: Haa.

AM: Dadku guryo yar yar oo isku urursan leeyihiin, waxaa weeye sida xanuunku ku faafayaa waa si kharul caadi ah. Xanuun badan baa jira, xanunada caloosha ku dhaca ee daacuunku ku jiro

Dhasantariyadu ku jirto ee Xundhurta lagu yiraahdo afka Soomaaliga uu ku jiro xanuunka Tayfoor fiifarka ama Tiifowga la yiraa.

AY: Ingiriiska waxaa weeye Tayfoor, daacuunku muxuu ahaa?

AM: Daacuunku dee waa *chlora.*

AY: *Chlora*, dhamaan kuwaas.

AM: Haa, waxaa jira Habitaytus A oo isaguna dee xanuunada faafa ku jira. Indha caseeye iyo Joonis labadaba way yiraahdaan Soomaalidu.

AY: Labadcaba way yiraahdaan.

AM: Haa. Markaa xanuunadaas weeye waxa dadka inta dhibaatada xooga lehi ka soo gaarayen.

AY: Waa fayris.

AM: Waxay ku faafayaan wax yar duqsigaa iyo sax xumaanta iyo musqul la'aanta iyo waxaa. Markaa waxaanu sameynay mashruuc la yiraahdo nadaafada iyo dib u dejinta qaabka magaaladu u degayso. Biyo in loo geliyo. Dadka qasabado loo sameeyo biyaha ay ka dhaansadaan, meelo waro ah bay leedahay marka meesha la degay warahaas baa dadku ka soo dhaansan jireen ayaamihii hore markaa qasabadaa markiiba degdeg loo geliyey.

AY: Ceelal.

AM: Ceelal horey u lahayd. Laakiin waa la kordhiyey ceelashii oo kuma filna waayo dadka.

AY: Haa.

AM: Oo marka qasabadaha qoys walba looma geyn kareyn markaa intii meel isla deganba. Qasabadaa loo geeyey, wadooyin yar yar baa laga dhex sameeyey oo dhex mara.

AY: Oo qaada.

AM: Laakiin qaybta ugu weyni waxay ahayd musqulaha reer walba oo meeshaa degay in uu musqul yeesho buu hadafkayagu ahaa. Hadaba dadku wuu isku daydaa, waxaanu sameynay in aanu niraahno reer walba waxaa loo sameeynayaa musqusha inta shubka ah ee sare.

AY: Uh-uuh.

AM: Reerkii musqul qota, birihii lagu qodayey waa la idin siinayaa.

AY: Waa gartay.

AM: Wixii xaydaabkii lagu xiray waa la idin siinayaa.

AY: Waa gartay.

AM: Dhagaxa shubka ahna waa la idin siinayaa.

AY: Uh.

AM: Laakiin waa reerkii doonaya dee in uu god yar qoto.

AY: Waa gartay.

AM: Dadku markaa waxay u badnaayeen dad wada reer magaal ah oo dee Xamar iyo Kismaanyo iyo ka yimid.

AY: Waa gartay.

AM: Cidna ama nina ma dooneyn in uu duurka aado waanu u yar fududeynay.

AY: Haa.

AM: Markaa dadkii markiiba degdeg waxaa markiiba loo sameystay musqulo, xanuunadiina markiiba way yaraadeen, taasi kama ay jirin meesha la yiraahdo Dhoobley.

AY: Uh.

AM: Dhoobley dad badan baa ku dhintay oo xanuunada faafa ee saxa xumada darteed.

AY: U dhintay.

AM: Haa, in kastoo degdeg badani ugu soo talaabeen oo dhinacan yimaadeen. Adigu Al-xamdu lilaah halkaas, waxaan kaloo iyadana ka shaqeeynayey wax la yiraahdo ee xoolaha ma aragtay inta aan la qalin waa in la baaro caafimaadkooda, neefku in uu saxo qabo oo la cuni karo iyo in aan.. qaar baa waxaa jira Anthraaks af Ingiriiska waxa lagu yiraa qaba “Kud.”

AY: Waxa aynu oran jirney Kudka.

AM: Haa.

AY: Waa Anthraaks ku ka Kud baa?

AM: Haa.

AY: Hagaag.

AM: Xanuuno waxaa jira xoolaha beerkooda iyo hadii qofkii tababar qaba ee caafimaadka bartay uu garanayo. Markaa taasna subaxa hore waa ku kalihi jirey shaqadeyday ahayd neefaanan ogeyn ilaa aan anigu arko aan la qalin magaalada.

AY: Waa gartay, sideed ku baari jirtay? Maxaad ku baari jirtay?

AM: Dee ma jirin qalab laakiin makii horaan tababarka Muqadishu aanu ku qaadanay.

AY: Waa hagaag.

AM: Markaa xirfadaydii bay ahayd.

AY: Xirfadaada waa taataabanaysaa mise?

AM: Taataabashada kaliya ma aha, indhahaad ka eegaysaa, neefka xanuunsan iyo kan kale waad kala garanaysaa markiiba hadii aad dusha ka eegto sidii aad qofka u garanayso.

AY: Haa.

AM: Waanu hadleyn uuun ee dhogortiisaad ka garanaysaa ee afkiisaad ka garanaysaa hadaanu dhareer laheyn.

AY: Dhareerka.

AM: Hadii dibnahiisu qalalan yihiin, indhihiisaad ka garanaysaa en Fatanarii ma anaan ahayn laakiin Caafimaadka Guud dadkii loo tababaray baanu ahayn.

AY: Waa gartay. Een markaa waa soo gudubtay shaqadaas baad qabatay. Goormay hiyi kaca iyo kugu bilaabmeen in aad Mareykan mise danba kama saadan laheyn?

AM: Walaahi markaa Mareykan uma aanan socon.

AY: Ma ogayd in wax Mareykan la yiraahdaa uu jiro?

AM: Haa, Mareynka waa ogaa. [qosol]

AY: [qosol]

AM: Markii aan Xamar joognay ee aanu ardada ahayn.

AY: Haa.

AM: Ee waxaanaan ogeyn dee dhaqanka waa la iska yaqaanay. Micheal Jackson iyo sida xitaa timaha loo goosto.

AY: Uh.

AM: Sida Mareykanka uun baa la koobi gareyn jirey.

AY: Waa gartay. Waad ku jirtay kuwii sidaa ….

AM: Kuma jirin kuwaa waa la yaabi jirey [qosol] aad baan ula yaabi jirey, soo maad garan.

AY: [qosol] Haye.

AM: Xoogaa dhaqan xag jir ah yacni dadka dhaqanka Soomaalida ma aragtay baan ka dhashay qoys ahaan.

AY: Markaa taadaad ku qaboobayd.

AM: Reer Waqooyiguba sidoodana waxay ahaayeen dad waxaa…

AY: Qalafsan oo waxaa iska raaca.

AM: Haa, dad waa iska jireen dee nooc kale ah laakiin ninyahow anigu diin ahaan xageeda.

AY: Haa.

AM: Ayaa waxoogaa intii aan am aragtay gurmadka iyo waxaa ku jiray.

AY: Haa.

AM: Waxoogaa diintaa ii yare iftiintay.

AY: Dhadhantay.

AM: Haa, markaa waxoogaa dee qiimeyntaa darteed ma aanana ku jirin dadkaa laakiin hadaan taadii u soo noqdo.

AY: Haa.

AM: Markaan dhowr bilood mashruucaa ka shaqeynayey oo runtii dee dadkii bulshadii aan aad iyo aad is leeyahay wixii markaa aan la qaban karayey aan la qabtay. Nin yar aan ahaa. Ayaa waxaa dhacday nin seedigay ah oo aanu wada soconay oo dhalasho Tanzaaniyaan ah haystay.

AY: Haa.

AM: La yiraahdo oo iminka magaalada inal jooga.

AY: Haa.

AM: Ayaa yiri waa tagayaa hal kaasaan aadayaa reerkaygana waa raranayaa waan ka kaxaynayaa wadankaygii baan aadayaa.

AY: Markaa dhalashada xaguu ku qaatay Tanzaania?

AM: Tanzaaniyaan buu ahaa dee waa Koosa Fara waa taqaan.

AY: Koosa Faare, haa.

AM: Tanzaania barigiii hore ee bari samaadkii 60 deeyadii.

AY: Buu galay Tanzaania.

AM: Buu isagoo inan yar ah galay oo aduun nin dalmar ah buu ahaa aduunkoo dhan soo maray, laakiin dhalasho Tanzaaniayaan ah buu haystay.

AY: Waan gartay.

AM: Ka dib meesha af Sawaaxiligana wuu yaqaaney oo dee waaba Tanzaaniyaan dhalasho haysta, een markaa dadkii kale wuxu yiri waan kaxaynayaa ninkan wuxuu yiri waxaan la doonayaa in aan la raadiyo.

AY: Adiga.

AM: Wuxuu yiri mustaqbal kale ayaa la jecelahay…

AY: Adigu markaa intaanu ku oran aan kaa dhex galee intaanu ku oran mustaqbal kalaan la jecelahay intaad mashquul ahayd ee aad dadka daad gureynaysay, ma ka fakaraysay aayahaaga? Mise waqtiba umaad helin.

AM: Aayahayga nin yahow markaan dib u milicsado waxaa jirey nin Allaha u naxareestee hada dhintay oo la oran jirey Jaamac Labo Qoys oo markii horena Xamar wakaaladii biyaha haysan jirey, waxaa la igu yiri ninkaa waxaa loo soo diray isboonsar iyo wax saasaa loo soo direy oo waxaa la yiri Mareykan iyo meelahaas yaa aadaysaa adigu wax yaa la yiri. Waxaa igu maqaalo ah ninkii waa uu diiday.

AY: Waa gartay.

AM: Markaa Herbert baan u sheegay ninkaa aan saaxiibka nahayoo waxaan ku iri nin yahow

ninkaasi wuu diiday baa la yiri, anigu markaa waxaan is leeyahay odayga wax baa ka si ah.

AY: Waa gartay.

AM: Uxuu xeradan iyo dadkan ka ag qabanayaa.

AY: Odaygu markaa ma idin la shaqeeyaa oo ma idin la joogaa?

AM: Mayee odaygu dadka wuxuu ahaa dad mas'uulka ah xerada oo dadka caawiyuu ahaa.

AY: Waa gartay.

AM: Herbert markaa dee nin iga yar weyn buu ahaa wuxuu ugu yiri. Ninkani waa nin caqli badan buu yiri. Wuxuu diidayaa dadkiisa oo dayacan in uu ka tago, inuu dadkiisa caawiyo doonayaa soo ma aadan garan.

AY: Haa, oo daneysto asagu.

AM: Haa, dantiisa kama fakarayee tan bulshaduu ka fakarayaa. Markaa aniga taasi iguma duxun, inan yar baa ahaayoo bacbac leh.

AY: Markaa…

AM: Waxaan raadinayey noloshan mid ka sii wanaagsan baan anigu markaa.

AY: Haa.

AM: Markiiba waan u riyaaqay runtii anigu su'aal in kastoo ay maskaxdayda ay yare gashay oo aad la iila taliyey oo la igu yiri ninyahow nin yar baa tahay waad shaqeystaa, Sawaaxiligaa iyo Afrikadaa hadaad hore u sii gasho waa meel baa'ba ah.

AY: Haa.

AM: Haa, ha tagin. Shaqada ugu wanaagsan magaaladaad haysataa. Xageed ku carari?

AY: Haa. [qosol]

AM: Een Markaa shaqadaada ha is dayicin. Rag baa aad ii waaniyey waaweyen. Oo dee aabahayba uu waliba ku jiro Allaha u naxariistee.

AY: Markaa aan dib kuu yar celiyee, wali macnaha sheekada waad yare dabcinaysaaye.

AM: Haa.

AY: Macnaha mustaqbal doonku mar walba adigu waa kugu jirey.

AM: Aniga mar walba waa igu jirey.

AY: Geedi baa tahay.

AM: Haa, noloshan mid aan ku xasilayo ma aheyn.

AY: Haa.

AM: Dadka in aan caawiyo uun mooyaane.

AY: Haa.

AM: Ma ahayn nolol i qancinaysa aniga.

AY: Waan gartay. Ma waxaad og tahay in aad qaxooti tahay mise waxaad og tahay in wadankii burburay mise waxaad intaba?

AM: Mayee nin horta Caasimad wadan wax ku bartay oo magaalo nadiif ah ka yimi oo meel waasac ah ka yimi.

AY: Haa.

AM: Oo dee dhaqan reer magaalnimo isku tirinaya.

AY: Haa.

AM: Baan ahaa. Markaan Xamar joognayna.

AY: Haa.

AM: Dee dhalinyarada wax dhoof la yiraahdo ayaa niyadooda ku jiri jirtay.

AY: Haa, markaa markii wadanku soo baa'bayey iyada laftirkeedu ahayd.

AM: Haa, dibad u dhoof iyo hiyad kac waxa la yiraa ninka dhoofa markaanu Xamar joognay wuxuu ahaa ninka liibaana ee ay u gashay, qofku wuxuu is dhiibay hadii la yiraa waa nala qaabilay.

AY: Haa, waa la qaabilay.

AM: Haa, xaguu iska dhiibay Hoolland iyo Iskaandaneefiyanka adigu wadamadaa.

AY: Waxay ahayd akhbaar.

AM: Hebel wuu is dhiibay oo waa la qaabilay, labadaa kalmadood baa aad u xoog weynaa, markaa dee ana tii uu baan lahaa aad ka daba tagtid.

AY: Hagaag, halkan waxaa ku haystaa fursad, oo waxaaba soo baxay seedigaa Koosa Faare.

AM: Haa.

AY: Oo ku leh ninkan waa kaxaynayaa.

AM: Haa.

AY: Waa gartay.

AM: Markaa waan raacay dee baabuurkiisana wuu watay kii uu Xamar ku watay bu uwali wataa, meesha Kiinya gudaheeda shatiga wadaha ayuu sameystay ninkan ma ahayn…

AY: Waa nin wax kala garanaya.

AM: Nin wax kala garanaya ayuu yare ahaa.

AY: Wali wuu sitaa dhalashadii Tanzaanaiya?

AM: Tii Tanzaaniya buu sitaa haa.

AY: Waa gartay.

AM: In kastoo ma uusan qaadan sumada gawaarida Kiinya, laakiin wuxuu haystaa warqad dhaqdhaqaaq ah. Inuu meesha ku dhex wadan karo, dee Kiinyana xerada ayuu gaarigu u yaalaa.

AY: Gaariga uu wataa waa noocee?

AM: [qosol] Gaarigaasi wuxuu ahaa gaari waxaan u malaynayaa Soomaalida imanka Market II u yaqaanaan.

AY: Ma wuxuu aahaa gaari weyn oo xamuul mise?

AM: Maya, gaari yar buu ahaa.

AY: Gaari yar buu ahaa.

AM: Cresida Station ma aragtay Wagon ka ah.

AY: [u/i]

AM: Gaari yar.

AY: Oh, hagaag.

AM: Gaari yar bu ahaa.

AY: Waa gartay.

AM: [qosol] Gaarigii baa markaa gabadhii aanu walaalaha ahayn ee uu qabay iyo caruurtiisii adigu taladii markii dhinac walba laga rog rogay waxaan iri ma harayo waa raacayaa, sdii baan ku soo baxnay Nayroobi baanu nimi.

AY: Uh.

AM: Nayroobi baanu ka sii gudubnay, Tanzaaniya ayaanu tagnay.

AY: Waa gartay.

AM: Daara-Salaam, muddo sanad ku dhowdhow ayaanu joognay.

AY: Waa gartay.

AM: Ka dib markaa xoogaa Daara-Salaam markii aanu joognay een qaxootinimaa intayadii aan dhalashada haysan loo qaabilay.

AY: Tanzaaniyaa qaxootinimo idiin qaabishay.

AM: Haa.

AY: Waa gartay.

AM: Lacag yar markaa qof kasta la siin jirey.

AY: Waa gartay.

AM: Intay ahayd iminka magaranayo. Waxaan u malaynayaa iney ahayd 60 kun oo lacagta Tanzaaniya ah.

AY: Oo Tanzaaniya Shilling miyaa lacagtoodu?

AM: Haa oo faa'iido badan lahayn.

AY: Haa.

AM: Ma garano malaha 30 doolaar ah baa bishii nala siinayey. Qofkii walba ee qaan gaar ah.

AY: Waa gartay.

AM: Taana saanu ku soo helnay si dhib badan bay ahaydoo, anagoo dhalinyaro badan ah baanu tagnay meeshii hay'adii UNHCR ka. UNHCR kii waa na qaabi wayday. Mudaharaad baanu sameynay xerada dhexdeedii.

AY: Imisa baad tihiin?

AM: Ilaa 40 tameeye baanu markii hore ahayn. Waa nala qaabili waayey naag ajnabi ah oo waxaa haysatay wadamadaa Galbeedka Africa ah ka timi, meeshu meel musuqmaasuq ah bay ahayd marka may doonaynin iney cid qaabilaan.

AY: Waa gartay, markaa marka ma laaluush bay qaataan mise way uun iska kiin dhibayaan?

AM: Koleyba dowlada Tanzaaniya, Wasaaradaha Arimaha Gudaha iyo xafiiska xiriir baa ka dhexeeyey ah in aan la qaabilin cid cusub.

AY: Waa gartay.

AM: Meesha dhexdeedii baanu niri ma baxayno ilaa nalo aqoonsado inaanu qaxooti nahay.

AY: Gabigaba.

AM: Haa.

AY: Yaa waxa kan qaba ma abaabuleyaashii baad ku jirtay marka?

AM: Adigu dadku waa badnaa dadkaas uun baan ka mid ahaa.

AY: Waa gartay.

AM: Ka dibna waanu diidnay habeenkii in aanu baxno shantii markii la xirayey baanu meshii ku harnay.

AY: Waa gartay.

AM: Ciidan baa markaa nalagu soo dalbaday.

AY: Waa gartay.

AM: Ciidamadii Tanzaaniya ee booliiskaa nalagu soo dalbaday waanu diidnay.

AY: Waa gartay.

AM: Xabaday kor u rid rideen, dad loo buulo xoofteeyo ninman xabad iyo dagaal ka yimid baa nahayoo buul xooftadii waanu diidnay.

AY: Waa gartay.

AM: Dhagxaan baa la gurtay, waa la iska celiyey.

AY: Dhagxaan baad gurateen.

AM: Haa.

AY: Waa gartay. Miyeydnaan gudaha ku jirin xagee dhagxaan ka helaysaan?

AM: Gudihii baan ku jirnaa laakiin waxay ahayd dhagxaan meesha taalay oo waxaan u malaynayaa in ay ka hareen dhismayaal iyo wax saas ah.

AY: Haa.

AM: Adigu askartu mana ay badnayn askartaa markaa dowladii bay gaartay waxaa la yiri ninyahow sida dadkan hadii aynu calankaa UN ka hoostiisa ku layno.

AY: Haa.

AM: Dhibaataa inaga soo gaarayasa.

AY: Waa yahay.

AM: Adigu waa tashadeen oo waa naga tageen.

AY: Waa gartay.

AM: Markaa go'aan bay gaareen ah in inaan qof ka baxa mooyaan aan qofna soo gelin cuntana nalo keenin.

AY: Waa gartay.

AM: Bal waa nala tijaabinayaa inta maalmood ee aan…

AY: Ku jirayno.

AM: Dee bariba ha iska yaaceen baa la is lahaa.

AY: Waa gartay.

AM: 6 cisho baanaan ka bixin xafiiskii UN ta.

AY: Oo aan waxba idin ka degin.

AM: Waa naga dagooadigu qaab kalaa wax nooga dageenoo niman Soomaali ah oo magaalada horey u deganaa oo…

AY: Hagaag, hagaag mudaharaadkii wuu socday mudduu socday waxaad ku jirteen 6 cisho.

AM: Xeradii UN ta meeshii xafiiskooda weyn Xaruntooda.

AY: Haa, haa, een markii dambe waa la idin qaabilay.

AM: Adigu markii dambe waa nala qaabilay, gunadaa yarna waa nalo qoray.

AY: Waa garatay.

AM: Halkii waxaan bilaabay inaan af Sawaaxiliga barto.

AY: Waa gartay.

AM: Si fiian baan u bartay, waayo nolosha Tanzaaniya iyo tan Kiinya isku mid ma aha Kiinyaatiga qof kasta xataa qof caseeyaha ah Ingiriiska wa uu yaqaanaa waad la xiriir karayasaa.

AY: Waa gartay.

AM: Laakiin Tanzaaniyaanku dee nin madax ahoo Jaamacado iyo meel galay mooyaane.

AY: Haa.

AM: Ma yaqaanaan.

AY: Waxoodu waa Sawaaxili.

AM: Waa Sawaaxili, waana asalkii Sawaaxiliga dadka ku hadla kan rasmiga ah. Iyaga iyo Mombaasa weeye iyo dhinaca xeebta ee Muslimiintu degan tahay.

AY: Waan gartay.

AM: Markaa waa magaalo Xamar u eg u ekayd barigaas dee hada ay u eg tahay ma garanayo

Tanzaaniya laakiin xiligaa waa ’92 dii magaalo aad iyo aad u deganoo wanaagsanoo nimco weyn leh bay ahayd.

AY: Uh-uuh.

AM: Adigu halkii noloshaa laftigeedu waa ii cuntami wayday.

AY: Waa gartay.

AM: Waxaan go’aansaday in aan ka tago.

AY: Wax yar aan ku hakiyee sidaad Sawaaxiliga ku baratay? Miyaad akhriyeysaa? Ma dadkaad macnaha sided gacanta ugu dhigtay?

AM: Aniga af Sawaaxiliga…

AY: Intaase joogay meesha?

AM: 9 bilood baan joogay Tanzaaniya.

AY: Ma 9 ka bilood markaa af Sawaaxiliga ku baratay?

AM: Haa, Sawaaxiliga barashadiisa maba adkaba marka hore. Waxaa jira Carabiga aad buu ugu badan yahay marka qofku hadii Carabiga wax ka gargaranayo bilow, mida kale aad da’ yar tahay oo qof iskuulo iyo wax soo dhigtay tahay buugaag baa iibsanaysaa buugtii baan iibsaday dadkaas la hadlayso biyo isii qof aad ku tiraahdo ma jiro ama waa inaad sida dhagoolaha u hadashaa ama waa in aad is ciqaabtaa oo ku barataa deg deg.

AY: Waa gartay.

AM: Tee biyo cabaashaad marka hore baranaysaa ka dibna ma oran karo dee waxaan ka gaaray meesha ugu sareysa laakiin anoon cidna u baahnayn iyo turjubaan toona.

AY: Haa.

AM: Ayaa adigu halkaa Sawaaxiligii kaga tahay.

AY: Waa gartay.

AM: Markii halkaa nala qaabilay oo aan cabaar joognay.

AY: Sidee inii ogolaadeen?

AM: Dee hadafkaygu markii aan dhinac walba ka eegay.

AY: Haa.

AM: Waxaan is iri nolosha halkan Tanzaaniya ah.

AY: Haa.

AM: Nolol aad kuu sii anfacaysa ma aha.

AY: Waa gartay.

AM: Xagaa iyo South Africa uun baa dadku u sii jeeday.

AY: Waa gartay.

AM: Markaa tacabir.

AY: Haa.

AM: South Africa ah baa ugu taagnaa.

AY: Waa gartay.

AM: Dee markaasaan halkaa saa kaga tagay.

AY: Markaa qaxootigii waa ka qoran tahay waad ku jirtaa liiskooda hadana waa sugu wayday, qaxootiga markaa is qoreysay laakiin waxaa weeye waxaa rajo laga sugayaa Qarbiga meel ksataba ha ahaatee Qarbiga?

AM: Qarbina markaa rajo kama anaan sugeyn ee waxaa weeyaan xoogaag yare e dhaqaalaha ah iyo sharciga dowlada ee aad ku joogto.

AY: Haa, baa doonayseen.

AM: Warqad baa lagu siinayaa wadanka inaad joogi karto hadii kale laakiin qaxooti ma tihid. Tacabire aan sharciyeysanayn ah ayaa noqonaysaa hadii aadan wax haysan.

AY: Haa, waad isa shaciyeynaysay.

AM: Haa.

AY: Waan gartay.

AM: Magaaladu magaalo iska Soomaaliya oo kale ah bay ahayd, cilimadeedu waa iska yare

kulayl.Dhinacna Xamar ha uga duwan, waa Xamar uun, waa isku wada eg yihiin Xamar iyo Tanzaaniya iyo Daara-Salaam.

AY: Haa.

AM: Aad bay isugu ekaayeen qaab ahaan.

AY: Sedexdaasu.

AM: Haa, waa magaalo xeebeedyo. Muslim iyo waa meel la is dhex degan yahay iyo Kististaanba iyo nooc ay doonaanba ha ahaadeeene kuwa diinta Afrikaanka haysta. Markaa waa dadka aduunka ugu dulqaadka badan Tanzaaniyaanku.

AY: Tanzaaniyaanku.

AM: Haa.

AY: Waan gartay.

AM: Ma aha dad dagaal badan. Kiristanka iyo maanta oo dhan bay doodayaan iyo Muslimku. Fagaare weyn oo Manaasmoja la yiraahdo ayaa la isu yimaadaa fagaarahaas maanta oo dhan.

AY: Manasmoj.

AM: Manasmoja.

AY: Moja.

AM: Moja.

AY: Oo Moja waa maxay macnaheedu?

AM: Waa kow af Sawaaxiliga.

AY: Moja.

AM: Haa.

AY: Waa hagaag.

AM: Fagaarahaas yaa la sigu yimaadaayoo sidii khayriyadii oo kale ah.

AY: Haye.

AM: Galabtiibaa waa Ceel-gaab.

AY: Haye.

AM: Waa la isu imanayaa, dhinac daawo yaa asali baa lagu gadayaa, dawooyinkii dhaqanka.

AY: Haye.

AM: Oo nooc walba leh.

AY: Haye.

AM: Dhinacna waa sixirka kaliya waa indho sarcaad.

AY: Waa gartay.

AM: Dhinaca kalena waa diinta.

AY: Waa gartay, waa sedex qaybood.

AM: Haa.

AY: Waa gartay.

AM: Markaa waa la tuban yahayoo galabtii waa la isu wada imaanayaa magaaladaa u soo daawasho tagaysa. Culimada Muslimkaa hadlaysa, Muslimku waxay isku gartaan koofiyada. Koofiyadaa yar. Hadaadan sidan Muslimnimadaada wax baa ku jira. [qosol]

AY: Hadaanad sidan.

AM: Haa.

AY: Haye.

AM: Waa la doodayaa maantoo dhan.

AY: Waa galab walba.

AM: Galab walba haa.

AY: Waa gartay.

AM: Waa fagaare furan weeye.

AY: Waa gartay, markaa qaarbna dadka way dhageysanayaan.

AM: Waa la dhagaysanayaa haa.

AY: Qofkii doonta.

AM: Qaarna way soo Muslimayaan wax dee anigu ka sii baxaya ma arag diinta Muslimka laakiin dood baa ka dhaxeysa.

AY: Adigaan baadi doonaynine mala way jireene. [qosol]

AM: Waa laga yaabaa waa suuro gal waa suuro gal.

AY: Markaa dadka doodayaa ma sideenee bay sidii dadka Soomaalida ah saf ku soo jiraanoo waa dad la soo xulay mise qaar qofkii safka soo galaba oo kii doonaa waa qabsanayaa?

AM: Mayee waxaan u malaynayaa iney dad isa soo habeeyey yihiin xitaa Soomaalida diinta waa la sameyn jirey, dhawaan waa arkaysay ninman Qaadiriyo iyo niman maxaan ku iraahdaa Salafiin ah oo doodaya oo Tiifiiga loo qabtay oo kale. Marka waa noocaas oo kale, laakiin iska furan oo galab walba ah.

AY: Waa gartay.

AM: Dadkuna dhageysanayaan.

AY: Waa gartay.

AM: Markaa lama ccayi karo diinta dambi baad galaysaa dowladeed hadaad diinta wax ka sheegto waad ka dhaadhicin kartaa, laakiin af lagaadada askarta baa joogta.

AY: Macnaha diinta cid walba.

AM: Diimaha lama caayi karo.

AY: Ama Kiristaan ha ahaado ama Muslim ha ahaado.

AM: Haa.

AY: Wan gartay.

AM: Markaa waa meel fiican markaa adigu cabaar markaan joogay waxaan go'aansaday in aan sii wato safarka.

AY: Waa gartay.

AM: Oo markan ku beegan South Afrika.

AY: Waa gartay.

AM: Reerkii aan wada soconayna.

AY: Haa.

AM: Halkaasaan iyagiina ku kala harnay.

AY: Waa gartay.

AM: Waxaan markaa raacay baabuur yar yar oo meesha soo martay.

AY: Haa.

AM: Zaambia dekad ma laha.

AY: Waa gartay.

AM: Waxaa u dekad ah halakan. Markaa wadanka ku xiga Tanzaaniya waa Zaambia.

AY: Yes.

AM: Xagaan u sii soconayaa South Afrikaan sii higsanayaa dhowr wadan oo kalaa iga xiga.

AY: Uh.

AM: Mayee Baas baan raacay oo u socday xaduudka.

AY: Waa gartay.

AM: Markaa waxaan qaatay jaa sharcigii Tanzaaniyaan sitaa.

AY: Oo been abuurid ah?

AM: Ma u malaynayo in uu been abuurid ahaa, kii asalka ahaa baan u malaynayaa in uu ahaa.

AY: Haye.

AM: Laakiin waa la ii soo sameeyey.

AY: Saasaa laguu soo sameeyey.

AM: Haa.

AY: Waa gartay.

AM: Een waa qaatay xaduudkii xoogaa waxaan is iri dee waa lagu yare garanayaa.

AY: Haa.

AM: Nin abti iigu aadan oo meesha degan.

AY: Haa.

AM: Oo Makhaayad ku leh reer Waqooyin halkan shaaha uun bay u yaqaanaan.

AY: Haa makhaayad cunto.

AM: Haa

AY: Haa.

AM: Haa hudheel bay yiraahdaan reer Waqooyigu.

AY: Hudheel bay yiraahdaan haahe.

AM: Marka waa hudheel. [qosol]

AY: Waa gartay.

AM: [qosol] Dee wixii la garto weeye ma og tahay.

AY: [qosol] Waa yahay.

AM: Baa halkaa aan isku barangay meesha la yiraahdo Daara-Salaam intaa Daara-Salaam joogay iman jirey markaa xduudkuu degan yahay xaduudkaan ugu tagay wuu isoo dhaweeyey wuxuu I yiri waxaan ku saarayaa baabuurta caadiga ah.

AY: Waan gartay.

AM: Umaan tagin marka laantooda socdaalka oo shaki baa igaga jira waxaan sitaba.

AY: Waan gartay.

AM: Inuu sax yahay iyo in uu khalad yahay ilaa iminka kuuma kala sheegi karo.

AY: Markaa meeshaad kaga gabanaysaa waxaa weeye?

AM: Mayee xaduudka Tanzaaniya.

AY: Haa.

AM: Tanzaaniyaanku in ay yiraahdaan adoo Soomaali ah sidee waxayaga hadaadba soo qaxdaye.

AY: Haahe.

AM: Dee nin cusub baan ahayo waxaan is iri ninyahow.

AY: Yaanad gilgilin.

AM: Haa ninkii baa ii soo dhameeyey wixii.

AY: Haye.

AM: Intuu iga qaaday buu wuxuu iigu sii dhuftay bixidii Zaambia la galayey bixidii Tanzaaniya la galayey labadaba wuu yaqaanay laanta socdaalka.

AY: Haa, hagaag.

AM: Soomaalidu waa dad la yaab leh wax walba iyagaa dadka caawiya ninkaasi ma aha nin ama wax iga qaadanayey nin I caawinayey buu ahaa.

AY: Waa gartay.

AM: Soo ma aad garan Soomaalinimadu sida ay u weyn tahay baan ku tusayaa.

AY: Haa.

AM: Ee halkii baanu ka baxnay gaari baabuurta yar yare e ka so degta dekada Daara-Salaam.

AY: Hee.

AM: Ee cusub ee dowlada iyo hay'ado wax loo waday ma naqaanee oo ilaa 6 iyo 7 ah.

AY: Haa.

AM: Baanu raacnay dhowr baanu nahay marka sedex kalena waa iska helnay meeshii oo Soomaali ah.

AY: Hagaag.

AM: Oo dhalinyaro ah.

AY: Waa gartay.

AM: Oo aan Daara-Salaam isku naqaanay.

AY: Waa gartay, laakiin aydnaan wada socon.

AM: Anaan wada socon markii hore.

AY: Ee iidnaan meesha ku balamin.

AM: Maya anigu kaligay baa markaa ahay.

AY: Waa gartay.

AM: Halkaan wiilal baa ka helayoo waa is raacnay, markaasaan baabuurtaas kiraysanay.

AY: Waa gartay.

AM: Waa bilaa taariko waa cusub yihiin ilaa Lusaka caasimaday na geeyeen.

AY: Waa gartay.

AM: Zaambia.

AY: Waa gartay.

AM: Markii horaan aqaanay dee xogtaad sii aruursanaysaa marka hore.

AY: Haa.

AM: Yaa kaa horeeya waa sidii reer miyigii oo kale.

AY: Haa.

AM: Yaah, halkaa yaa jooga, hebel baa jooga halkaasuu degan yahay akhbaartaad si aruursanaysaa.

AY: Waa gartay.

AM: Markaa oday adeerkay ah oo Cabdi Aftaag la yiraahdo baa Lusaka degan. Oo wuxuu ku lahaa shirkad yar oo baabuurta ah baabuurta xamuulkabuu ku lahaa.

AY: Waa gartay, waxa kale ee cajiibka ahi waxaa weeye hadaad socdaal tahay oo xataa iska mushaaxdid waxaa laga yaabaa.

AM: Haa.

AY: In eheliyadaadii ama qaraabo waxay doonayaanba ha ahaadaane iney dunidaa ku wada quban yihiin.

AM: Wayba ku wada quban yihiin.

AY: Haa.

AM: Anigu isaga markaa waxaan doonayaa Zaambia isagaan sii higsanayaa.

AY: Waa gartay.

AM: In aad ku sii hakado.

AY: Waa gartay.

AM: Dhowrkii nin ee kale ee aan wada soconayna.

AY: Haaheey.

AM: Waxaa lagula balamaa islaan aanu isku qolo nahay oo Maama Caasho la yiraahdo.

AY: Haa.

AM: Baa Soomaalida iyo Itoobiyaankaba soo dhaweysa. Hudheel yar bay ku leedahay meesha qofkii wax hayana

AY: Haa.

AM: Way ka qaadaaa kaan waxna haynina wuu iska seexdaa.

AY: Cajiib.

AM: Maama Caashaa la yiraahdaa iyagu markaa waa Suju.

AY: Waa gartay.

AM: Maama Caasha baa loo sii tilmaamaa Soomaalida waxaa la oronayaa markaad tagto Zaambia oo Lusaka joogto waxaa tiraahdaa halay tsuo meesha Maama Caasho. Horta Kiyaamaa tagaysaa maxay ahayd magaceedii, magic bay leedahay Tazanyo tii Ugaandhana midna Kazanyaa la oron jirey midna Kayaamo tan Kayaamaa la yiraa.

AY: Haye.

AM: Waxaad oronaysaa Kayaamo I gee baad gaariga oronaysaa.

AY: Waa gartay, markaa Kayaamo waxaa weeye ma wixii anagu reer Waqooyiga aanu oran jirney astaankii miyaa?

AM: Kayaamo mayee waa xaafada Soomaalidu degan tahay, waa in yar oo Soomaalidu degan tahay oo Eastlea oo kala ah.

AY: Waa gartay.

AM: Markaa halkaa tagto waxaad oronaysaa qofka kula socda hadaad baas raacdo iyo hadaad tagsi awoodba Maama Caasha meesheedii I gee way wada shaqaanaan marka waligeed way eganayd meesha.

AY: Waa gartay.

AM: Meesha Maama Caasho iyo odaygaan u socdayna guri miyaa u dhexeeya mise labo guri.

AY: Waa gartay.

AM: Soomaalidu dee waa intaa yar halkaas waa labo kooxood.

AY: Haa.

AM: Kooxi waa rag dhargay oo kii waliba boqol gaari leeyahay.

AY: Waa gartay.

AM: Boqol gaari leeyahay.

AY: Leeyahay.

AM: Haa.

AY: Waa gartay.

AM: Sida geela oo kalaa loo tiriyaa baabuurta xamuulka ah kuwa yar yar ma aha.

AY: Waa gartay.

AM: Oo xamuulka ah.

AY: Uh.

AM: Kuwa kale ee Soomaalida ah ee saan u dhumucda weynayni halkaa Kamaanyada ayey degaan raga kale xaafado qaali ah ayey degaan.

AY: Waa gartay, halkani waa xaafadii dan yarta.

AM: Haa, markaa halkaasaanu ku soconaa anagu.

AY: Waa gartay.

AY: Tii baanu tagnay, odaygii maalintii markiiba waan helay, een cabaar markii aan joogay adigu ilaa waxaan u malaynayaa labo bilood oo dhow dhow baan joogay.

AY: Waa gartay.

AM: Ha tegin buu ugu yiri.

AY: Waa gartay.

AM: Halkaakan joog ila shaqeeyso, baabuurtan adigu maamul ii maamul dee nin yaroo wax garanayaa tahaye.

AY: Waa gartay.

AM: Waa ka soo fakarayaa baan ku iri.

AY: [qosol]

AM: Islaanta u qabo.

AY: Haa.

AM: Waa habar yar bay iyaduna iigu toosan tahay.

AY: Haye.

AM: Marka labada dhanba reer ka waa ka ahay, xaga islaanta iyo xaga xaajigaba.

AY: Waa gartay.

AM: Markaa gurigii si wacan oo gobanimo leh baan ula joogay, la ii soo dhaweeyey aad iyo aad si weyn.

AY: Caruur ma leeyihiin?

AM: May.

AY: Waa gartay, maba leh caruurba?

AM: Maya, maya caruur.

AY: Ubadba.

AM: Ubadba. Markaa markaan labo bilood oo dhowdhow joogay ayaan waxaan ku dhahay adeer waa sii soconayaa.

AY: Haye.

AM: War maxaa South Africa ka dooni oo kaa yaal.

AY: Waa gartay.

AM: May waxaan doonayaa in aan sii tacabiro oo aduunka.

AY: Haye, waxaa weeye imanka hadeeyto Soomaaliyaad ka timi, Kinyaad ka timi.

AM: Kiinya, Tanzaaniya.

AY: Zaambiya.

AM: Waa tii afraad.

AY: Waa kii afraad baad joogtaa.

AM: Haa.

AY: Waad sii socotaa.

AM: Haa, wuxuu igu yiri waa haaye hadii aadan joogayn bal waa yahaye waan ku ambobixinayoo waxoogaa lacag ah buu I siiyey.

AY: Waa gartay.

AM: Aan ku sii sicdo South Africa.

AY: Waa gartay.

AM: Nin baanu is helnay meesha joogoo.

AY: Uh, intaadan Tanzaaniya ka bixin.

AM: Maya.

AY: Zaabiya ka bixin.

AM: Lusaka, guriga odaygu wuxuu leeyahay mawlac ah lagu tukudo.

AY: Waa gartay.

AM: Buu leeyahay.

AY: Waa gartay.

AM: Barxadiisaa lagu tukadaa.

AY: Waa gartay.

AM: Markaa nimaan maqlicii yaraa isku baranay.

AY: Haa.

AM: Oo aanu ku saaxiibnay markaa saaxiib ma aanu ahayn laakiin dib baanu ka saaxiibi doonaa ayaa meeshii iska baranoo isna dee xagaa u sii jeeda.

AY: Waa gartay.

AM: Ninkii baanu heshiinay in aanu is raacno.

AY: Waa gartay.

AM: Waxaa nalagu yiri South Africa Siligu waa koronto ciyaar laguma geli karo wadankoo dhan xaduudka korontaa ku wareegsan ayaa nalagu yiri.

AY: Waa gartay.

AM: Ma aha meel orod lagu gelayo een waxaanu iska dhignay wax alle waxaanu sidanay,

boorsooyin baanu sidanay markii hore.

AY: Waa gartay.

AM: Wax walba waa sidanay shahaadooyinkaygii baasabooradii kii Tanzaaniya, mid Soomaali ah wax alla waxaan sharci sidanay.

AY: Haa.

AM: Bartii baan uga tagay gurigii odaygaan dhigay.

AY: Waa yahay.

AM: Hadaa la ii keenay oo dib baa la iiga keenay.

AY: Dhawaan baa lagu keenay?

AM: Gabar walaashay ah oo bari dhexdaas timid baa I keentay sawiro xamar aan kaga soo qaxay [qosol] labaatan…

AY: [qosol] Waa kuwaan doonayee.

AM: Labaatan sanno yaa kuwa maqnaa yaa hada i soo gaaray dhawaan.

AY: Waad is garan wayday.

AM: Haa.

AY: Haye.

AM: [qosol] Marka ninkii baanu is helnay Xassan baa la yiraahdaa.

AY: Waa gartay.

AM: Waxaanu Xassan ku heshiinay in aanu South Africa aadno.

AY: Waa gartay.

AM: Waxaa naga xiga hadii dhinacaan Zimbabwe la marana Zimbabwe oo qudhaa naga xigta.

AY: Waa gartay.

AM: Hadaanu Zimbabwe iyo Botswana marnana labaa naga xigta.

AY: Waxaa idinka xigaya een.

AM: Labo wadan.

AY: Haa, labo wadan baa idinkka xiga, hagaag.

AM: Marka waxaanu is niri Zimbabwe baa hawl yare, dhulkna lama kala aqoon waa ’92 dii weeye.

AY: Waa gartay.

AM: Soomaali saas ah oo meesha martaana ma jirto.

AY: Waa gartay.

AM: Dadkan ilbaxayee meel walba jabsaday ma aha, meeshii baanu is raacnay waxaanu raacnay baas, dharna ma sidano nin walbaa wuxuu sitaa sedex surwaal oo u iska kor gashan yahay.

AY: Iska kor gashan yahay!

AM: Haa, iyo sedex shaar meeshu waa qabow iyo jaakad nin walowba dharkaagii saasaan isgu habaynay.

AY: [qosol]

AM: Waxaagii waa isu sidataa boors la’aan.

AY: [qosol] Waxaagii waad gashan tahay.

AM: Haa.

AY: Markaa waa labadiina iyo…

AM: Waa labadayada qura aniga iyo Xassan.

AY: Waa gartay.

AM: Halkan buu degan yahay Minneapolis, halkan magaaladan buu degan yahay.

AY: Gabigaba.

AM: Haa, reekiisii iyo caruurtiisii joogaan.

AY: Waa gartay.

AM: Waan isla nimid.

AY: Waa gartay adiga iyo Xassan.

AM: Haa.

AY: Hagaag.

AM: Xassan Dheeraa la yiraahdaa.

AY: Haye.

AM: Waxaa ugu darayd, waxaanu tagnay waxaa nalagu yiri ileyn tilmaam baanu ku soconaa.

AY: Haa.

AM: Hadaad tagtaan meesha la yiraa Livingstone.

AY: Haa.

AM: Waa xaduudka Zaambiya iyo meeshay iska gooyaan Zimbabwe wax Soomaali ah nin qura arki maysaan.

AY: Waa gartay.

AM: Markaa Masaajidka taga ee inan Soomaali ah oo meesha markaa noogu yimaada baa Jaamacad ka dhigta.

AY: Zimbabwe!

AM: Xaduudka halkaa Livingstone. Labada dhinacba way ku taalaa dhinacna waa Zimbabwe dhinacna waa Zaambiya. Labada dhanba waa ku taalaa Zimbabwe.

AY: Waan waan gartay waana isku magic.

AM: Zimbabwe du tan baa'baday ma ahena waa dad kibray barigaa.

AY: Haa barigaas.

AM: Cirkay marayeen, so ma aad garan.

AY: Haa.

AM: Magaalooyinkeeda Harare iyo Buulowaayo Nayroobi iyo owaxaa macne uma sameynayd.

AY: Waa gartay.

AM: Meelaha Africa ugu quruxda badan aby ahaayeen.

AY: Waa gartay.

AM: Ee nin Soomaali ah oo dee reer Waqooyi ah baa Harare ku leh baa nala gu yiri malaha kawaan, bugar buu ku leeyahay.

AY: Waa gartay.

AM: Waa ninkay ku baxday kalmad Ingiriis ah ayaaba lagu yiri fasax intuu qaatay oo Burci tagay buu in badan maqnaa shaqadii ka maqnaa.

AY: Haye.

AM: Barigii dambuu soo noqday, malaha sanad iyo labo wuxuuu maqnaa garan maayee.

AY: Waa gartay.

AM: Nin marka Ingiriis ah oo u u shaqeeyn jirayoo Ingiriiskii baa ku yiri baa la yiri oo dee ku yiri reer Smith kii malaha.

AY: Haa.

AM: [qosol] Kii baa ku yiri, xagaad ku maqnayd?

AY: Uh, Roodiishiya ayaal aorna jirey.

AM: Haa, markaasuu ku yiri reerkayagii baa ii doortay Suldaan, caaqil ma aha waa ka sareeyaa.

AY: Haa.

AM: [qosol] Suldaan baa la iga dhigay buu yiri.

AY: [qosol]

AM: Gaalkii baa yaabay wuxuu yiri ninkii intaa adiga ku shaqeeynayey.

AY: Haa.

AM: Baa Suldaan laga dhigay Boqor wuu u qaadan waayey wuxuu yiri ‘Kawaanle Boqor

nioqday dhabtii waa shaqo culus. [qosol]

AY: [qosol] Haye.

AM: Ninkii sheekadaasi ku soo baxday weeye baa la yiri.

AY: Haye.

AM: Anagu ma anaan arag sheekadiisaan maqalnay.

AY: Haye.

AM: Halkii Livingstone baanu tagnay xaduudka weeye waa magaalo marka, meeshan quruxda badanee gaaladu dalxiiska u tagtee ee Victoria Falls la yiraahdo weeye.

AY: Waa gartay.

AM: Biyihu saa u dhacayaan godka waa meesha wabiga Africa ugu balaaran oo ka bilaabmo.

AY: Haa.

AM: Wabiga Zaambaysi baa la yiraahdaa, Niil waa ugu dheer yahay kana waa ugu balaaran yahay.

AY: Kana waa ugu balaaran yahay haa.

AM: Markaa ilaa 8 wadan o Afrikaan ah ayuu maraa wabiga Zaambaysi, halkaasuu ka bilaabnaa Victoria Falls.

AY: Haa, halkaasuu ka bilaabmaa.

AM: Haa.

AY: Hagaag.

AM: Tan hada Bufallo ku taal maxay ahayd magaceedu, heblaayo Falls?

AY: Niagara Falls.

AM: Niagara Falls, waxaasi waa bikh. Taasaa ka qurux badan boqol goor Harikabtar baa saa u wareegayoo lagu ilaalinayaa.

AY: Gabigaba.

AM: Yaxaaska iyo Jeerta iyo waxa aduunka Marooodi meeshaa ku jira oo duur jooga ah madaxaagaasi keeni maayo, diyaaradaha dalxiiska ah ee acdaanka ah ee Yurub Ingiriiska iyo meelahaas aduunka ka yimid. Baa Harikabtar kiraysanaya waa lagu soo wareejinayaa, xayawaankaa la tusayaa nooc walba leh yaah.

AY: Xayawaanka duur joogta ah.

AM: Xayawaanka duur joogta ah oo nooc walba leh waa meelaha dee wiyisha iyo joogaan yaah marka halkii baanu tagnay dhinicii Zaambiya markaa wadan ay ka yare jajaban tahay bu ahaa oo yare sabool ah.

AY: Dhaqaalihiisu liito.

AM: Copper buu lahaa Copper kiina waa ka yare khasaaray een Zimbabwe na markaa cirkay maraysaa xaduudkeeda waa ilaashataa, iminkana waa bil cagsi aduunku waa is bedelayaa.

AY: Yaa.

AM: Iyagaa la iska ilaalinayaa.

AY: Yaa.

AM: Xaduudkii Zaambiya waxna nalama oran waa dhaafnay.

AY: Robert Mugabe baa ku kaadshay.

AM: Ma hubo in la oran karo.

AY: Aniga xagayga.

AM: Adiga xagaaga dee waanagii is yare ogeyne.

AY: Oh, dhulkaynu isku haysanay weeye.

AM: Dhulkaynu isku haysanay weeye [qosol] sheeko dheer weeyee.

AY: Haaye ka socoo.

AM: Xaduudkii dhinacii waxaanu dhaafnay dhinacii Zaambiya, dhinaca Zimbabwe weeye marka meesha la ilaalinayaa ee khatarta ah, waxaa nala yiri maxaad ahaydeen waxaanu sidanaa marka xoogaa yar oo looshin ahoo aan marba isku yare caseynayno oo aan is leenahay yaan la idin ka garan busaarada iyo in aad niman qaxooti ah tihiin.

AY: Waa gartay.

AM: Dharkuna waa noo nadiifsan yahay.

AY: Waa gartay.

AM: Xagee ka timaadeen? Oo dalxiis baanu nahay.

AY: Yaa salaam!

AM: Haye wadankee tihiin Sacuudi? [qosol] Indha adaygayaga yaah.

AY: [qosol]

AM: Markaa Xassan Ingiriiska ma yaqaan markaa.

AY: Waa gartay.

AM: Aniga weeye ninka yare xumbaynaya waa aniga Sacuudi baan nahay.

AY: In yar oo aa Muqadisho ku soo baratay.

AM: Haa dee.

AY: Iyo intaad iskuulada dhiganaysay.

AM: Mayee iskuulada intaan Jaamacada meesha dhiganayey kuwii aan ku bartay weeye, waligayaba xitaa barigii aanu yareyn.

AY: Haa.

AM: Eenu Laas Caanood joognay.

AY: Haa.

AM: Waa lagu tartami jirey Ingiriiska, anagoon cidina noo dhiginoo ardayda dhexdeeda.

AY: Haa.

AM: Baa la iska akhrisan jirey Book-I iyo Book-II iyo waxaa laakiin markii dambe ayaan anigu bartay.

AY: Hagaag.

AM: Oon maadoyin ku qaadanaynay, markaa waxaan ku iri Sacuudi baanu nahay.

AY: Haye.

AM: Ma Sacuudi baa tihiin haa hagaag waa naga rumeysteen.

AY: Waa gartay.

AM: Xassan waa nin cas. Oo dheer.

AY: Waa gartay.

AM: Dee malaha waxaa la is yiri waxau sheegayaan wax baa ka jira. [qosol]

AY: Haye.

AM: Waa nala sii daayey xagii shishe oo meeshii iska soo daawanayoo soo dalxiisnayoo soo araganayoo markaanu wa xoogaa joognay.

AY: Uh-uuh.

AM: Baanu waxaan waxaas oo dhan u soo sameynaynay oo dharkayagii iyo waxayagii uga nimid Wabiga ayaa la yiri waa laga gudbaa.

AY: Yaa Allah haye.

AM: Iyo Wabigoo wabi caadi ah ma aha, waxaa jira Wabiga Shabeelle Meeshuu ku dhmaado.

AY: Haa.

AM: Haawaay baa la yiraahdaa.

AY: Waa Haro weeye ishu ma arkayso.

AY: Waa gartay.

AM: Siduu u socdo buu wabi nimadii joojinyaa oo faafayaa marka.

AY: Hagaag.

AM: Kana waa meeshuu ka bilaabanayey waa meeshii biyuhu ka soo dhacayeen.

AY: Haa.

AM: Waa Harooyin, sida Haro maanyada ku taal Harar agteeda oo kale.

AY: Haa.

AM: Iyo dee kuwa halkeenan oo kale Harooyin weeye saas oo kale isgu furan oo jasiirado yaryari dhexda kaga yaalaan.

AY: Waa gartay.

AM: Oo laga yaabo ineysan waxba biyuhu dheereyn.

AY: Saw adinku marka aad askarta leedihiin dalxiis baanu nahay meshaad sahaminaysaan.

AM: Haa anagu waxaan doonaynaa meeshaan ka gubdi lahayn.

AY: Meeshaad ka gudbi lahaydeen wa gartay.

AM: Baa raadsanaynaa.

AY: Waa gartay.

AM: Waa soconay dharkii baanu la baxnay dee wax yar oo gaaban baanu isku reebnay dharkayagii kale bacaanu ku guranoo madaxaan u qaadanay.

AY: Uh-uuh.

AM: Waa ka gudubnay intii badnayd waa soconay, markaanu in door door ah soconay.

AY: Uh-uuh.

AM: Waa maalin waa nalo sheegay oo waxaa nalagu yiri Yaxaaska iyo Jeerta iyo balaayada iyo Jibisada.

AY: Haa.

AM: Jabisadu waa bahalkan masaska waaweyn ah.

AY: Haa, haa Baytoon.

AM: Haa, waxaa weeyaan.

AY: Waa gartay.

AM: Baa buuxa.

AY: Uh-uuh.

AM: Markaanu soconay oo biyhii gaabnaa waxaana jirtay.

AY: Wabigii baa doonaysaan in aad dhex martaan.

AM: Mayee waaban ba marnay waan dhaafnay badankiisii.

AY: Waa gartay.

AM: Waa kala goog'an yahay markaad waxoogaa wabi yar ka gudubtaba oo cabaar socotaba kuma liqaayao waa gaaban yahay.

AY: Haa, waa gaaban yihiin.

AM: Haa waa biyo aan dheereyn.

AY: Markaa waad soconaysaan.

AM: Haa.

AY: Marna maydaan dabaalan wali?

AM: Maya dabaal ma anaan gaarin.

AY: Waa gartay.

AM: Waxaa laga yaabaa in halkaa xabadka kuu gaaro.

AY: Waa gartay.

AM: Waanu soconay, waanu soconay marba waanu ka gubudnay mar dhul baad yare maraysaa hadana biyo kale hadana mar kale ku soconay markaanu cabaar badan soconaynay baan waxaan u tagnay meeshii waynayd ee Wabigii xooga u soconayey mid waa in yar oo dhuuban.

AY: Haa.

AM: Intii yareyd ee dhuubnayd baan ku iri Xassanow halkaa kama gudbi karno.

AY: Waa gartay.

AM: Waa aqaanaa anagu Wabiyan iyo waxan.

AY: Waa gartay.

AM: Intaa Wabi baan arkayey.

AY: Haye.

AM: Markuu saa isu gano bahalku.

AY: Haa.

AM: Dee waad aragtay baabuurta say ugu dhuftaan dabaal kasta oo aad taqaan waxba kama jiraan.

AY: Mar haduu haa…

AM: Xiimayo saa u karayo, markaa waa aanu noqonay.

AY: Haye.

AM: Halkaanu ka nimid baanu ku noqonay.

AY: Waa gartay.

AM: Markaanu gudbi kari waynay.

AY: Waa gartay.

AM: Waxaanu nimid meeshii aanu ka dhaqaaqnay maanta duhurkii baan goor casar liiq ah ku soo noqonay oo magaalada ah qarkeedkii.

AY: Waa gartay.

AM: Nin baanu u tagnoo waxaanu ku niri ninyahow waxaanu doonaynaa xaga Zimbabwe wax noo gudbiya.

AY: Haye.

AM: Oo dee na hor galoo meesha yaqaana oo dee bahalahan huuriga leh huuriga.

AY: Haa.

AM: Baanu rabnaa waa yahay buu yiri na keena hada waa la I qabsanayaa buu yiri meesha waa la ilaaliyaaye.

AY: Haa, caawa marka salaada maqrib oo kale anaga inoogu beegan ileyn iyagu maqrib ma

yaqaaneene isugu keen keena halkan.

AY: Waa gartay.

AM: Meel buu tilmaamay meeshii baan so is taagay caawoo dhanba fadhi ninkii waa no gooyey.

AY: Waa gartay. Ma Soomaali baa isagu mise waa ajnabi?

AM: Maya, maya waa madowga wadanka ragii lahaa weeye.

AY: Waa gartay.

AM: Markaa daanta Zaambiyaanu joognaa, waxaanu u gudbi kari waynay waa xagii shishe.

AY: Waa gartay.

AM: Wabigaa kala qaybiya labada wadan.

AY: Hagaag.

AM: Masaajidkaanu xalay seexanay baanu ku noqonay, Masaajidku wuxuu leeyahay meel madariso ah yaa buu leeyahay.

AY: Uh-uuh.

AM: Halkii baanu tagnay, waxaanu gu tagnay wiil Ugaandhays ah oo si fiican noo tilmaamay wuxuu yiri dhageysta waxaan oo dhan anigaa aqaana oo aad u aqaana, waa Muslim marka.

AY: Haye.

AM: Lagama yaabo in aad ka gudubtaan Wabigan wixii idin ku yiri orod baa kaga gudbaysaana ma aha buu yiri anigaa koontarabaan iyo aduun iyo meel walba maray.

AY: Haye.

AM: Cilmi kalaan idiin sheegayaa.

AY: Ha ina waalina buu yiri.

AM: Haa.

AY: Waa gartay.

AM: Ninkan Masaajidka horta hadii aad tiraahdo Masaajid oo aad dhulkaas marayso.

AY: Haa.

AM: Wax Masaajid garanayaa ma jiro.

AY: Waa gartay.

AM: Laakiin hadii aad tiraahdo Kaniisada Hindidaan rabaa.

AY: Haa.

AM: Masaajidkaa lagu keenayaa. [qosol]

AY: [qosol]

AM: Markaa Hindidaa u Muslima, Kaniisada Hindidaa oronaysaa. Markaa Kaniisada Hindida baa lagugu geynayaa meel walba.

AY: Waa gartay.

AM: Meel bay na siiyeen waxay yiraahdeen halkaa iska seexda dadku waa wada cusbaa Soomaali saas ah lama aqoon wax walba Soomaaliya iney burburtay idaacadahaa laga dhageystaa, ma garatay.

AY: Waa gartay.

AM: Hadkii baanu ninkii baan is aragnay wuxuu nagu yiri nimankan ninka Iimaamka ah ee Malawiyaanka ah.

AY: Haa.

AM: Ha idin caawiyeen subixii.

AY: Waa gartay.

AM: Waxaa jirta meel baas laga raaco.

AY: Ninkii macnaha Soomaaliga ahaa idin leh.

AM: Maye.

AY: Kii kale.

AM: Kaase Harare uu joogaa lama gaarin. Livingston waa xadudkii laakiin waa magaalo aad u

weyn. Oo cajiib ah iyada klaftigeedu Livingston ku.

AY: Waa gartay.

AM: Kuwii Hindida ahaa baau la hadalnoo waxaanu niri runtaanu u sheegnoo waxaanu niri halkaansaan u soconaa marka waxaanu doonaynaa qaabkaan u gudbi lahayn, waxay yiraahdeen subixii ninkaas Malaawiyaanka ah ha idin qaado mu'adinku gaari buu leeyahay Masaajidku ha la idin ku qaado adigu saldhiga bahalaha laga raaco ha la idin geeyo. Waxay damceen iney na siiyaan lacag yar. Waxaan kuu sheegayaa Soomaalida qabkeeda waanu diidnay, ma qaadanynaan niri wax lacag ah dee dad xishoonaya o owali nool baa nahay.

AY: Haa, haa. Haahe.

AM: Yaah.

AY: Waa gartay.

AM: Waanu soconay subixii sidii buu nagu qaaday markii salaada subax la tukaday yaa Iimaamkii na qaaday, Iimaamkii yaanu orane Mu'adimkuu na qaaday halkii buu na geeyey uu ininku noo tilmaamay.

AY: Uh-uuh.

AM: Baabuurta yar yar oo kuwaan maxaan ku iraahdaa Caasiga la oran jirey baa ka baxa.

AY: Waa gartay.

AM: Meel fog isla Zaambiyada ah laakiin xaduudka Naamiibiya iyo ah.

AY: Uh-uuh.

AM: Baanu u kireysnay oo uu noo tilmaamay tuulo yar makaad tuuladaas maraysaan buu yiri.

AY: Waa gartay.

AM: Ka dega, tilmaam baanu ku soconaa waa tuulo yar oo laami lahayn oon waxna lahayn.

AY: Uh-uuh.

AM: Markaad degtaan koontarabaanka meel laga talaabiyo Wabiga ayaa jirta oo tuuladaa ku taala.

AY: Waa gartay.

AM: Tuuladaas baa ka kireysanaysaan Huuri.

AY: Waa gartay.

AM: Xaga shisha la idiin gudbinayaa Botswana.

AY: Waa gartay.

AM: Zaambiya waa iloobaysaan.

AY: Waa gartay.

AM: Iyo Zimbabwe dhexdooda.

AY: Hagaag.

AM: Sidii baanu yeelnay.

AY: Uh-uuh.

AM: Tuuladii baan subaxdii baa gaarigu nala dhaqaaqay adigu ilaa kowdii labadii duhurnimo buu nagu dejiyey meel cida ah.

AY: Geeri go'an.

AM: Oo yiri tuuladii 5 mayl bay halkan u jirtaa halkan ka lugeeya ileyn darawalkii baanu la hadalnay oo u sheegnay. Tuuladii wadadaa yare ee wado xoolaad oo kale ah. Baa idin geynaysa.

AY: Wadooyin sidii wadooyinkeenii yar yaraa.

AM: Qof baa meesha ku degay tuuladii.

AY: Haa.

AM: Markaa suu yiri oo aanan af Ingiriiska garaneyn.

AY: Waan gartay.

AM: Kuwii afkooday kula hadleen oo nimankaani tuuladaasay u socdaane.

AY: Haa.

AM: Kaxee.

AY: Waa gartay.

AM: Kii baanu iska daba galnay is af garan marno.

AY: Uh-uuh.

AM: Tuuladii baan tagnay tuuladu waa tuulo yar oo dad saas ahi ma degana haday ugu badan tahay dee tuulo yar oo boqol qoys degan tahay qiyaastii.

AY: Waa gartay.

AM: Weeye, tuulo yar tuuladii baanu tagnay war heedhee maxaynu cunaa? Waxa ay nimanku hayaan xalaal ma aha [qosol] roodhi baanu iibsanay cuntadoodii oo dhan waxaanu afka gelino deee intii hore Soomaali baanu ku dhex jirnay.

AY: Haahe.

AM: Hada waxaanu noqonay Afrikaan kali ah Soomaaliba lagama yaqaan.

AY: Waa gartay.

AM: Muslim lagama yaqaan, marka waxaa jira kaluun yar oo sida lulumada ah oo ay shiilayeen.

AY: Uh-uuh.

AM: Wabigay kala soo baxeen waa lulumo lulumadii iyo roodhidii iyo xabad kooka-kaala ah.

AY: Haa.

AM: Baa ninkaayaba ku dhuftay.

AY: Waa gartay, intuu le'eg yahay?

AM: Hah bay leedahay.

AY: Intuu le'eg yahay kaluunku mise waa lulumo?

AM: Lulumada yar yare ee intaa le le'eg.

AY: Waaba lulumadii.

AM: Waa iska lulumo kaluunka yar lulumada la yiraa.

AY: Waa kaluun laakiin waa lulumo.

AM: Wax kaluun lagu oran karo ma aha waa wax adigu far yaradaa cididaa lele'eg.

AY: Waa gartay.

AM: Soo maad garan oo la shiiloo oo dee mirkii labo boqol oo midh laguugu gurayo.

AY: Waa gartay.

AM: Afkaan saa u gelinay waa hah, hahda ma taqaan.

AY: Haa.

AM: Qumarta waad ku xajiimoonaysaa markaa roodhi baanu dhex galinayoo cunay.

AY: Haye.

AM: Ka saarnay.

AY: Ilaa waa al gaajoonayaaye.

AM: Waxa aan xalaal ahaynba isaga uu baa xalaal ugu dhow.

AY: Haahe.

AM: Lo'da madaxaa laga garaacayaa waa la dilayaa hilibkeeda cuni kari maysid raashinkii maraqii bay ku wada kariyeen dee ma cuni karno.

AY: Waa gartay.

AM: Kaluun uun waxaan ahayn lama cuno kolkaas oo kale.

AY: Waa gartay.

AM: Anigu calaa kuli iyo xaal nimankii nin baan u tagnay dukaan haysta waan u sheegnoo waxaanu ku niri Quwaajaanu sidanaa lacag Zaambiyaan, lacag Zaambiyaankii in nalo badalaan rabnaa doolaarka mayee nalooga dhigo lacagta Botswana. Pula ayaa la yiraahaa. Lacag badan baanu sidanay oo Zaambiyaan ah. Oo laakiin hadii doolaar ahaan loo bedelo malaha ilaa ana $200 oo doolaar baan sitay Xassana $150 buu sitay.

AY: Waa gartay.

AM: Laakiin Quwaajaanu sidanay oo badan oo lacag Soomaalida aan ka dhicin. Badnaanta. Wixiiba waxaa naloogu bedelay wax yar. Oo Pulahu sedexda Pula waa doolaar.

AY: Wow, waa gartay.

AM: Sow ma aad garan. Wax yar bay na siiyeen miyey na khiyaamaynayaan mise waa caladaalad garan mayno.

AY: Waa yahay.

AM: Rag wax garanayana waanu isu haysanay markii hore.

AY: Waa gartay.

AM: Dee waa iska qaado.

AY: Haa.

AM: Wixii baanu qaaadanay, in yaroo muranayoo kordhiyoo dee waad iska Soomaliyeynaysaa war waxani waa khaladoo ma ahee wakaasi qaataa nala yiri. [qosol]

AY: [qosol]

AM: Ama wax baad garanaysaa ama garan maysid wax u dhaxeeya ma leh iska qaadanay intii yarayd baanu haysanaa.

AY: Uh-uuh.

AM: Waxaanu niri tuulooy waxaanu doonaynaa wabiga si nalooga gudbiyo huuri baanu rabnaa in nalooga gudbiyo waxaa la yiri waa la idinka ka gudbinayaa ninkaas halkaas u geeya hebel, hebelkii u geeya kiibaanu u tagnayoo wuxuu yiri haye saacad ka dib Wabigu wuxuu inoo jiraa ilaa 10 kiiloo mitir.

AY: Haye.

AM: Wax ku dhowdhow.

AY: Waa gartay.

AM: Waynu lugeynaynaa galabta casarkii baynu caraabaynaa.

AY: Waa gartay xilimaad joogtaan markaa?

AM: Adigu waa ilaa labadii duhurnimo sedexdii, horta timihii waanu iska gaabinay

AY: Waa gartay.

AM: Waa is habaynayaayaha, saan na loooga garan.

AY: Waa gartay.

AM: Wuxu uyiri Wabigu waa labio Wabi.

AY: Uh-uuh.

AM: Oo in yari u dhaxeyso labio wabi oo Jasiirad baa u dhaxeeysa Jasiiradana Botswana ma lahee waxaa leh Naamiibiya.

AY: Uh-uuh.

AM: Waxaa la yiraahdaa Impalila Island.

AY: Waa gartay.

AM: Markaa cadaan baa ilaaliya xaduudka.

AY: Gabigaba.

AM: Haa, oo Naamiibiyaan ah.

AY: Waa gartay.

AM: Waa dhulka laga ilaaliyo Koontarabaanka iyo Boojiska iyo.

AY: Haa.

AM: Nimankaas waxay aad u leeyihiin khayraadkaas ma aragtay xayaaanka duur joogta ah.

AY: Haa, haa.

AM: Markaa waa la ilaaliyaa.

AY: Khatar, haye.

AM: Booliiskooduna waa dad adag oo aad u xun baa la yiri, waxaan u malaynayaa ayaamahaas in ay xoriyada qaateen.

AY: Waa gartay.

AM: Ileeyn South Africa barigaa wali xor ma ahayn ma og tahay marka iyagu – iyagu markaas

uun bay dee tii la oran jirey Koofur – Galbeed waxaa larna jirey Naamiibiya barigii hore markaas bay xornimada waa ku cusub tahay.

AY: Haa, waxay haa….

AM: Qayb South Africa ka mid ah bay ahaan jirtey. South Africa aa gumeysan jirtay.

AY: Toban sanadood miyey markaas haystaan xornimada?

AM: Markaa cirkaasay marayaan waa yahay baanu niriyoo sheeko yaanan kugu daaline ninkii baanu is raacnay wiil yar buu soo kaxaystay oo uu yiri abnaa dhalay oo ilaa toab jir labo iyo tioban meelahaas ah afartayadii baa lugeynay Wabigii baanu afka saarnay, wuxuu nagu yiri huuri baa ii yaala lacagtii wuu naga qadintay uu nagaga gudbin lahaa.

AY: Uh-uuh.

AM: Waanu tagnay Wabiga qarkiisii markii qoraxdu dhacday baanu is taganay, wuxu yiri huurigaygii gurigaa reerkaa ma aragataa dabkiisu baxayo buu huurigaygii yaalaa madaxaan ku so qaadayaaye wiilka yar ii sii haya.

AY: Waa gartay.

AM: Wabiga qarkiisii baanu fadhinaa.

AY: Waa gartay.

AM: Sugnay, oo sugnay oo sugnay ninkii waa nagu sooo noqon waayey.

AY: Waa gartay.

AM: Anagii iyo wiilkii yaraa waa isku xayiranay.

AY: Waa gartay.

AM: Wiikii yaraa baa wuxuu nagu yiri war odaygii wax ku dhacay ma aqaane waa soo eegayaa ileyn waa naloo heshiiyey.

AY: Haahe.

AM: Iga daba kaalay buu yiri.

AY: Haa.

AM: Nimanka waa camaynayaaye ninku waxba ma laha doon ma leh waxba ma leh hadal baa

nalaga iibiyey.

AY: Waa gartay.

AM: Oo lacag nalagaga qaatay.

AY: Waa gartay.

AM: Inankii yaraana markiiba aabihiis buu ka daba orday.

AY: Waa gartay.

AM: Sugnay odaygii iyo wiilkii yoo meeshii ku fiid sanay oo cabaar marki dambe yaanu kacnay.

AY: Uh-uuh.

AM: Waxaanu niri war hee dhee, dee Xassan.

AY: Sheekadu caynkaa ma aha…

AM: Wax baa ina haysta buu yiri aanu nimankii soo eegno reerkii baanu u tagnay war noocaas ah oo huuri idinka ka qaadayey, war waxaas ma jiraan bay inagu yiraahdeen, maba anaan arag cidna huuri uma hayno hana lug gooynina [qosol] war bal ina keen oo xagaynu aadnaa dee waa cidla ciirsi la'a iyo habeen badh wado yar oo wadada lugta ah ayuu na soo mariyey, wado xagaaf ah ma aha wadadu.

AY: Garan maysaan meel ay tahay?

AM: Meel Alle meel aanu aadno garan mayno tuuladii galabta aynu ka soo carownay baanu naqaanaa dib inoogu celiya ayaaunu ku heshiinay halkii baanu ku noqonay anagooo jidka sii socona oo ilaa malaha ilaa 9 kii fiidnimo tahay oo fiidki sii guuraynayna.

AY: Uh-uuh.

AM: Baa waxaa naga hor yimid ilaa 6 nin oo sita bahala dhaadheeroo saabab ah.

AY: Waa gartay.

AM: Waa isla salaanoo waar hayoo waa kuwamoo waxay noqdeen niman Angoola ah.

AY: Waa gartay.

AM: Oo qaxooti ah.

AY: Maxaad isku salaamaysaan?

AM: Af Ingiriis.

AY: Af Ingiriis, hagaag.

AM: Niman Angoola ah oo qaxoti ah bay noqdeen.

AY: Waa gartay.

AM: Oo tuulada deganaa.

AY: Waa gartay.

AM: Haye xagee u socotaan saasaa nagu dhacday baan niri, war magaciin ba'ye waa idin ku dhacdee anagaa doon haynee hadaad naga kiraysanaysaan anagaa idin gudbinayna.

AY: Waa gartay.

AM: Waa yahay waar inaga mari inkaar qabihii, xoogaa buu naga cunay.

AY: Waa gartay.

AM: Boqol boql pula ah ma laha wax saasoo kale ah.

AY: Waa gartay.

AM: Buu naga cunay.

AY: Uh-uuh.

AM: Oo 30 doolaar qiyaastii u dhiganta.

AY: Uh-uuh.

AM: Nimankii baanu raacnay, dib halii Wabigii baanu u raacnay.

AY: Uh-uuh.

AM: Nimanku niman wacan bay ahaayeen.

AY: Uh-uuh.

AM: Ajnabigu isagaa is caawiya.

AY: Waa gartay.

AM: Lacagtii uu ninku nagula heshiiyey mid rubuceed ah bay nagula heshiiyeen.

AY: Waa gartay.

AM: Waxay yiraahdeen bahalahaas dhaadheer ay sitaana.

AY: Haa.

AM: Waa kii huuriga looga gudbayey Wabiga.

AY: Wayba sitaanba.

AM: Ulihii bay sitaan doontii yareydna meeshay u taal.

AY: Waxay sitaan bahalkii.

AM: Saab.

AY: Haa.

AM: Bahalkaa yaree lagu gudbo.

AY: Lagu badal gareeyo.

AM: Haa.

AY: Haa haye.

AM: Haa dee kaasay sitaan ulaha dhaadheer ee fandhaalka ah.

AY: Haa.

AM: Bay sitaan.

AY: Waa gartay.

AM: Nimankii waa na qaadeen wali waa xasuustaa waa cado 15 tobnaad ah.

AY: Woow!

AM: Wabigii weynaa bay bartanka noo saareen kala barkii markii aynu maraynay ood ayixii

quruxda aad yaabaysid biyihii wilic-wilic Jeerta iyo Yaxaaska iyo waxa ku jira habar dugaag.

AY: Haa.

AM: Madaxaagu keeni maayo.

AY: Waad arkaysaan, waad u jeedaan.

AM: Maya ma aanu aragno laakiin waanu og nahay oo waa an lo sheegay oo waxaa la yiri bahalku waa ka buuxaa.

AY: Waa gartay.

AM: Kuwii kale ma aha waa meel balaayo ah baa la yiri.

AY: Waad baqaysaan.

AM: Waa taan kuu soo wade.

AY: Haye.

AM: [qosol] Xassan baan waxaan ku iri Xassanow, Alla caawa raaxo weynaa.

AY: Haye.

AM: Suuye maxaa raaxo ah bal nimcadaa dayaxaa shan iyo tobanka ah eega gilicda. [qosol]

AY: Haye.

AM: Waxa loo soo dalxiis tago iyo sahamintu waa tan oo kale.

AY: Haye.

AM: [qosol] Buu ku dhuftoo markaasuu yiri walaahi cadow baa tahay. [qosol]

AY: [qosol]

AM: [qosol] Cadowga la sheegaaa waa adiga.

AY: Isaguna kaadidii buu. [qosol]

AM: Cadowga la sheegaa waa adiga. [qosol]

AY: [qosol] Haye.

AM: Tuuladii baa nalaga gudbiyey Wabigii xagii shishe Impalila Island baanu tagnay marka waa meesha la ilaalinayee la leeyahay booliis habaar qabaa jooga.

AY: Waa gartay.

AM: Oo Laan socdaal iyo wax walba.

AY: Waa gartay.

AM: Qoraxdu hadii ay idiin soo baxday nagu yiraahdeen nimankii Angoolayska ahaa.

AY: Haa.

AM: Xabsigaa la idin gaynayaa ma joogi karaysaan.

AY: Waa gartay.

AM: Waa hagaag, waxay nagu yiraahdeen waxaa jira nin wadanka u dhashay markaa Jasiirada yar oo Naamiibiyaan ah oo dooni yar oo tan oo kale ah oo laash ah Wabiga kale u taalo.

AY: Haa.

AM: Wabiga kale ilaa 2 kiiloo mitir bay isu jiraan.

AY: Haye.

AM: Labada Wabi.

AY: Haye.

AM: Waa mid kale dilaacay oo intuu arlo Ilaahay soo maro ha dhow hadana isu soo noqon doona meeshu.

AY: Waa gartay.

AM: Markaa dhulka u dhexeeyaa waa ilaa 2 kiloo mitir.

AY: Waa gartay.

AM: Waa lugaynay tuuladii bay na geeyeen ninkii bay dee goor saq dhexe ah.

AY: Uh-uuh.

AM: Gurigiisii iyagu xagay u socdaan nimankani.

AY: Haa.

AM: Sac bay doonayaan lama ogola lo'du waa koontarabaan lama gudbin karo sac bay rabaan in ay ka soo qaadaan Naamiibiya inta saqda dhexe ah xaga Zaambiya caawa ula gudbaan markaa nimankani waxay doonta u sidaan kaliya.

AY: Haa.

AM: Sacaasay soo qaadayaan hadafkoodu waa intaa uun.

AY: Haa, waa imisa iyagu?

AM: Waa ilaa 6 waa wax sac qaadi kara dee, waa nimankaa soo heshiiyey dee.

AY: Cajiib, tolow miyey iibinayaan mise waa dhaqayaan?

AM: Waxaan u malaymayaa iney iibinayaan.

AY: Haa cajiib.

AM: Ma laha xagaasay lo'gu ku jaban tahay.

AY: Haa.

AM: Xagga Naamiibiya.

AY: Waa haa, waa laga yaabaa.

AM: Markaa ninkii bay noo geeyeen, ninku eey badan buu lahaa markiiba wixii baa isku kacay way la hadleen afkoodii nimanku niman wadanka in badan degenayaa bay ahaayeen.

AY: Uh-uuh.

AM: Afkoodii bay iskula hadleen ninyahow nimankan oo qariib ah baanu wadnaa waxaan doonaynaa in aad Wabiga xagga shishe uga gudbiso.

AY: Uh-uuh.

AM: Wuxuu yiri war saacadan naftayda ma nicin Yaxaas iyo Jeer baa na jajabsanaya aniga iyo iyagaba waagu markuu baryo ha yimaadeen.

AY: Waa gartay.

AM: Waxaanu niri.

AY: Xagaanu tagnaa?

AM: Dee isaguna nama hoyin karo qofkii qof hoyiya.

AY: Haa.

AM: Tuulada yari waa mid habaar qabta isagaa la xirayaa nimankii Angoolada ahaa bay waxay yiraahdeen nimanyahow mid sameeya.

AY: Uh-uuh.

AM: Sacayagii waa weynay.

AY: Haye.

AM: Waana noqonaynaa, hadaad na raacdaan oo tuuladii galabtaaad ka soo carowdeeen aan anaguna ka nimid.

AY: Haa.

AM: Caawa noo raacdaan bariga waagu qoraxdu markay soo baxayso waa idin keeni karnaa hadana.

AY: Haye.

AM: Lacag kalaad bixinaysaan ninka waa idiin keenaynaa intaan booliisku soo kicin ha idin qaado.

AY: Waa gartay.

AM: Waa yahay baanu niri.

AY: Waa gartay.

AM: Wabigi bay naga soo talaabiyeen.

AY: Uh-uuh.

AM: Waxaanu ku soo noqonay tuuladii aanu ka cunay kaluunka hahda leh.

AY: Waa gartay.

AM: Ee Zaambiya xageeda ahayd.

AY: Waa gartay.

AM: Ninkii lacagta naga xaday nimankii baan soo sheekaysanayoo waxaanu ku niri ninkii noocaa ahaa ee galabta noocaa ahaa.

AY: Uh-uuh.

AM: Baa lagactaas naga cunay.

AY: Uh-uuh.

AM: Waxaanu doonaynaa gurigiisii inaad na gaysaan.

AY: Uh-uuh.

AM: Nimanyahow anagu waxaanu nahay ajnabi.

AY: Uh-uuh.

AM: Tuuladuna waa tuulo yar waa nala garanayaa ha dhow anaga adhibaato nalo geysanayaa.

AY: Haa.

AM: Laakiin sheeda ayaan idinka tusaynaa.

AY: Waa gartay.

AM: Waa yahay baanu niri, wax hub ah galabta markaanu soo caraabaynay.

AY: Haa.

AM: Jabad aanu soo marnay, jabadka waad garanaysaa.

AY: Haa.

AM: Guri laga guuray.

AY: Haahe.

AM: Mindi yar oo dhilis ah oo aan daab lahayn.

AY: Haa, baad ka soo qaadateen.

AM: Baanu ka soo qaadanay, taasaa hore u sidanaa.

AY: Haye.

AM: Soomaalida waalideedaan ku sheegayaa.

AY: Haye.

AM: Gurigii baanu tagnay.

AY: Uh-uuh.

AM: Ninkii baanu ku garaacnay.

AY: Uh-uuh.

AM: Waa uu naga furi waayey, horta markii hore waxay nagu yiraahdeen guriga ha tagine ninkii wuxuu jiraa meel Jubukada lagu cabo. Jubukadu waa khamriga farikaanka.

AY: Waa gartay.

AM: Ee galayda la khamiiriyo ileyn kahmri kale ma helayaane.

AY: Uh-uuh.

AM: Halkaasuu saacadaan hadii lacag helo halkaasuu joogaa.

AY: Uh-uuh.

AM: Halkii bay na tuseeen dusjay naga tuseen halkaasaan idin ku sugeynaaye ka soo eegay yiraahdeen, meeshii baanu galnay oo balaayadaa saa isu dhex fadhido.

AY: Uh-uuh.

AM: Waa ka waynay.

AY: Uh-uuh.

AM: Waa isaga soo baxnay ninkii kuma jiraanu niri meeshii.

AY: Uh-uuh.

AM: Gurigiisuu bay sheeda naga tuseen wakaa mudulka halkaa ku yaal wuxu waa dhowr mudul - mudulo…

AY: Waa gartay.

AM: Iyo carshaan.

AY: Uh-uuh.

AM: Mudulkiisi bay farta naagu fiiqeen mudulkii baanu tagnay haraati baanu ku furnay ninka markaanu ku garaacnay oo uu naga furi waayey.

AY: Haa.

AM: Albaab fuustada waa sidii iska dhaqan Soomaali buu ahaa.

AY: Haa.

AM: Haraati baanu ku balaqnay.

AY: Uh-uuh.

AM: Xassan banaanka ayuu gaar iga noqday ana waa galay.

AY: Uh-uuh.

AM: Bahashii yareyd jaqafkii waa sitaa.

AY: Waa gartay, ninka ma garanaysaan dadkani waxay yihiin dabeecadooda ma taqaanaan?

AM: Dadka iska waxaynu nahay Ilaahay uu wato.

AY: Kibirka ka waran haye.

AM: Ninkii waxaan ku iri keen laacgtii.

AY: Wuu fadhiyaa.

AM: Wuu is taagay markuu arkay anigoo soo galay, Xassana albaabkuu taagan yahay banaankuu.

AY: Waa gartay waa xilima?

AM: Waa ilaa kowdii saqda dhexe labo iyo tobankii.

AY: Habeenimo.

AM: Haa, habeen barkii.

AY: Habeenimo.

AM: Haa.

AY: Balaayo idinku dhacday haye.

AM: [qosol] Wuxuu yiri.

AY: Hee.

AM: Xassan baa wuxuu maqlay haraatidii in uu isagu ku dhuftay iyo in aan adigu ku dhuftahy ma hubee.

AY: Hee.

AM: Hooyadii ninka hooyadii baa albaabka ku xiga ah.

AY: Haa.

AM: Habaratii baa soo baxday.

AY: Haa.

AM: [u/i] afkoodii bay ku hadlaysaa marka.

AY: Haa.

AM: Waa la inagu toosay buu yiri ninkiibaan waxaan ku iri lacagtii keen.

AY: Haye.

AM: Aad qaadatay.

AY: Farahaad kala hadlee.

AM: Wuu sarkhaansan yahay marka meeshii baarkii wuu ka soo baxay.

AY: Haa.

AM: Intuu is taagay buu darbigii kaadi ku shubay darbigiisii markaasuu maxaa rabtaa war ninyahow lacagtaadii waa ku siinayaa ma aha.

AY: Muxuu ku hadlayaa ma is fahmaysaan?

AM: Af Ingiriis.

AY: Ingiriis buu ku hadlayaa.

AM: Af Ingiriis buu ku hadlayaa isagu. Af Ingiriiskay yaqaanaan.

AY: Waa gartay.

AM: Kaasi wuxuu yiri lacagtii intaana waan hayaa ee intii kale khamri baan ku cabay shan kun baa naga dhiman oo Zaambiyaan ah marka.

AY: Haa.

AM: Intii kale wuu na siiyey.

AY: Waan gartay.

AM: Gacanta markuu nooga dhiibay baanu orad is xaabinay.

AY: Haye.

AM: Habartii iyo iyagoo dee [u/i] wada had hadlaya baanu cararnay.

AY: Haye. [qosol]

AM: Waxaanu u tagnay Angooladii.

AY: Oo meeshii idin ku sugaya.

AM: 6 doodii oo bartii noo fadhiya oo meel ku gabanaya ileyn waa dad tuulada laga yaqaan oo waa la dhibayaa ha dhoowto. Nimankii waanu u tagnay. Lacagtii waxbaanu ka siinay waxaanu niri balaayaan sameynaye waxaanu doonaynaa in aad na habaysaan.

AY: Haye.

AM: Na keenay na yiraahdeen dhib ma leh anagaa idin caawinayna.

AY: Haye.

AM: Gurigoodii bay na geeyeen.

AY: Haye.

AM: Waxay soo iibsadeen Jubuki khamrigii bay soo iibsadeen.

AY: Haye.

AM: Dab bay nagu hor shiteen qafulna dushay naga saareen.

AY: Haye.

AM: Baangooyina waa la soo baxeen waa na ilaalinayaan, waa gaar.

AY: [qosol]

AM: [qosol] Miyaanu gam'aynaa waxaanu is leenahay tuuladii baa idin raadinaysaan is leenahay.

AY: Haye. [qosol]

AM: Maba anaan seexan habeenkii.

AY: [qosol] Bahalka waqtiguna waa.

AM: [qosol] Hurdo ma jirto.

AY: [qosol] Haye haye.

AM: [qosol]

AY: [qosol] Sodon daqiiqo oo kale ayaanu haysanaa.

AM: [qosol] Nimankii waa na kaxeeyeen.

AY: Haa.

AM: Maba ay seexane markii aan labo saacadood sedex saacadood sii joognay bay yiraahdeen ina keena hadaba waryaa soo baxa.

AY: Waryaa dee ma idin yaqaanaan.

AM: Maya anagaa dee af Ingiriis midbaa noo turjumaya af Ingiriiskayaga yaqaan Angoolada.

AY: Waa gartay.

AM: Sedex iyo afar ka mid ah yaa ana kaxeeyey sidii ay shalay noo gudbiyeen bay habeenkii no ogudbiyeen mar labaadkii waagii markaan casaaday oo waa waabarigii.

AY: Waa gartay.

AM: Kii bay na dul geeyeen.

AY: Waa gartay.

AM: Namiibiyaankii.

AY: Waa gartay.

AM: Namiibiyaankii baa na kaxeeyey oo Wabigii kale anaga gudbiyey.

AY: Idinka gudbiyey.

AM: Intaaba waa ka gudubnoo markaa waxaanu joognaa Botswana.

AY: Uh-uuh.

AM: Botswana markaanu tagnay caadi meel magaalo ah oo aan Wabiga ka fogeyn baa jirta.

AY: Uh-uuh.

AM: Waa qadadii qoraxdii baa nagu kululaatay waa xiran tahay.

AY: Waa gartay.

AM: Meel aanu galas biyo ka cabno mar xagaasaanu u soconaa marna xagga magaaladoo dhan albaab furanima ma jiro. War ma Faystaa meesho may.

AY: Waa saacadma?

AM: Waa duhur.

AY: Magaaladuna waa xiran tahay?

AM: Haa.

AY: Cajiib.

AM: Bal sugoo waa yaabnay oo waxaan niri maxaa meesha ka jira.

AY: Waa gartay.

AM: Anagoo meel aan afkaa wax ka gelino biyo la'.

AY: Haa.

AM: Baa nimbaa wuxuu leeyahay Axmed, Axmed, waa hayaay. [qosol]

AY: Ma igu ciyaaraysaa?

AM: Walee iyo bile iyo tolee, Axmed, waa eegay waan aarki waayey waxaan is iri ninku ma shaydaan baa ninkan kuu yeeraya meeshan aadan waligaaba maqal xitaa.

AY: Haa.

AM: Waa maxay?

AY: Ma laha waa wax aad is leedahay maxaa ma codbaa ma codad baa maqlaysaa.

AM: Saasaan markii hore is iri.

AY: Haye, ma jinkii la sheegi jiray baa.

AM: Ma jin baa.

AY: Haye.

AM: Inankii Ugaandhayska ahaa ee na soo tilmaamay ee Livingston, Zaambiya Masaajidka aanu isku aragnay. Ilaa ninku waa koontarabaandiiste meesha isagaa mara oo wuxuu geeyaa birahan qaaliga ah [u/i] Zaambiyaa waxaa laga helaa macdano qaali ah oo yar yar.

AY: Haa.

AM: Ooo dee dahabka iyo waxaasi waa bikh, dahab ma aha.

AY: Uh-uuh.

AM: Waa [u/i].

AY: Koobarta iyo….

AM: Koobar iyo waxaasi waa qashin.

AY: Waa laga tagay.

AM: War waxaan meelahaan lagama yaqaan [u/i].

AY: Haa.

AM: Een [u/i].

AY: Maxay tahay [u/i]?

AM: Waxyaabahaan dadku isku qurxiyaan dadka qaaliga ah aduunka baa xidha.

AY: Marka ma dheeman baa talow?

AM: Dheeman ma aha dheeman ma aha.

AY: Ma garanayo waxa ay tahay.

AM: Dheemantu way ka yare hooseeyaan tan.

AY: Waa gartay.

AM: Laakiin [u/i] waxyaabahaasi waxyaabaha Zaambiya laga qaado ee la geeyo ilaa South Africa weeye.

AY: Haa.

AM: Birahaa macaadiinta khatarta ah dahabkana ak qaalisan uma dhowa.

AY: Ma laha taasuu qaadaa isagu?

AM: Waxaasuu qaadaa waana koontarabaan.

AY: Waa gartay.

AM: Ileyn waa wadadii uu mari jirey wadadan uu noo tilmaamay.

AY: Haa.

AM: Meeshii buu isagiina soo maray waa isu nimid, waxaanu ku niri meel aan wax ka cabno, wuxuu yiri oo dee maxaa idin ku dhacay maad magaalada wax aka cuntaan, dee waa wada xiran tahay. Wuu nagu qoslayoo ilaa Africa Ugaandha iyo Soomaaliya waa isku mid, qaboojiyeyaal ma shidano.

AY: Haa.

AM: Wadan nimcaystay oo sida Mareykanka ah iminka halkan waad aragtay.

AY: Haa.

AM: Dukaamadoodu waa wada xiran yihiin, waligaa waxaa laga yaabaa in aadan u fiirsan ilaa laguu sheego albaabadu way xiran yihiin.

AY: Albaabadu way xiran yihiin.

AM: Qabowga qaboojiyahaa loo xiray.

AY: Haa.

AM: Albaabo muraayado ah bay nimanku leeyihiin.

AY: Uh-uuh.

AM: Marka albaabka baayacmustarka ee Bariga Afrikada kale wuu balaqan yahay markuu furan yahay kan muraayadaa iska ceshan baanu waxaan moodaynay iney xiran tahay ma xidhna. Ninkii baa na kaxeeyey meeshiibaa cabitaankii iyo wixii aanu ka iibsanay, ninkii wuxuu yiri ninyahow waxaan u socdaa anaa idin kaxeeynaya meesha baaska laga raaco ee magaalada maxaan ku iraahdaa Francistown la yiraahdo.

AY: Haa.

AM: Waa caasimad weyn, caasimada labaad weeye.

AY: Haa.

AM: Francistown Baasaskeeda baan idin saarayaa.

AY: Waa hagaag.

AM: Wuu na kaxeeyey baaskuu baan tagnay Francistown waa Hargeysa sinaba uga duwana qaabkeeda iyo dhirta iyo buuraha iyo dooxa.

AY: Haa, iyo dhagaxa.

AM: Wax walba waa koobi geedii baa orannaysaa oo nimcaysatay.

AY: Oo ka qurux badan.

AM: Dee dheeman bay leedahay dheeman baa laga qodaa.

AY: Haa.

AM: Waligay wax isaga eg ma aanan arag.

AY: Waa gartay.

AM: Tii baanu tagnay, maxaanu ku soo baxnay dhulkaanu soo maraynay kaniisada Hindadaanu rabnaa uu baanu niri.

AY: Haa.

AM: Dag tagsigii markiiba Masaajid buu na geeyey.

AY: Waa gartay.

AM: Si kale ku garan maayaan.

AY: Waa gartay, waa Naamiibiyaan ku jirtaan marka?

AM: Maya, Botswana, Naamiibiya dhaafnay intii yarayd bay nooo ahayd.

AY: Naamiibiya intii yarayd bay idiin ahaynd, waxaad joogtaan Botswana.

AM: Halkii baanu tagnay nin Soomaali ah oo Masaajid ka soo baxay war heedhee wax xalaal ah xagee baanu ka helnaa, war xalaalane ma jirtee waxaas ma aragtay hilibkaa caadiga ah.

AY: Haa.

AM: Masiixiyiin baa qashay waa hilib caadi ahaoo diinta miyeydnaan waxba ka aqoon waad iska cuni kartaan, waar cuni kari mayno ayaanu ku niri anagu lugo digaag buu iska sitaa waa nin magaalada degan.

AY: Kibir baa idin hayee haye.

AM: Haa dee waa intaan la jabine. [qosol]

AY: Haa.

AM: Nimankii Hindida ahaa baanu u tagnay sidii si le'eg bay noo soo dhaweeyeen waxay nagu yiraahdeen niman yahow seexda halkaa meel iskuul ah waxay leeyihiin bddhin ah oo ku dhex taala halkii bay na seexiyeen waxay nagi yiraahdeen niman yahow xageed u socotaan South

Afrikaan niri waa wadanka angu xiga markaa waxba nooma jirto in ayr bay noo jirtaa nimankuu waxay nagu yiraahdeen niman yahow waa idin doo dhaweynaynaa waa idin seexinaynaa kow dheh, allkiin nin Xassan la yiraahdo oo Soomaali ah.

AY: Uh-uuh.

AM: Baa ushii qodbada Masaajidka Iimaamka naga xaday hada ka hor.

AY: Waa gartay.

AM: Usha dheer lagu istaago waxay u malaynayaa Xaalixiyada Soomaaliya.

AY: Haa.

AM: Ul dheer baa jirta oo mixraamka uu Iimaamku cuskado.

AY: Haye.

AM: Ushaasuu naga xaday.

AY: Haye, Xassan

AM: Nin Xassan la yiraahdo baa naga xaday bay yiraahdeen.

AY: Oo say ku dhacday.

AM: Inkaar buu qbay kaasi. [qosol] Angu waxaan niri waar anagu xadi maynee hadaanu joognana waa ku tukanaynaa.

AY: Haa.

AM: Dee maxaan ku iraahdaa dadkuna siku wada mid ma aha.

AY: Haye.

AM: Ninka ila socdayna Xassan baa la yiraahdaa [qosol] Xassan dheere.

AY: War sow isaga qabsadee.

AM: Mayee isagii ma aha.

AY: Haye.

AM: Iska kaftanayoo oo dee nimankii Hindida ahaa niman wacan bay ahaayeen.

AY: Haye.

AM: Subaxii dambe baanu baabuur kale waxaa n aka xeeyey Iimaam – Mu'sdin kale oo Mu'adinanu gawaari bay leeyihiin Masaajidku leeeyahay Mu'adinkaa wada.

AY: Waa gartay.

AM: Kii baa na geeyey Khabarooni waa magaalada Caasimada.

AY: Haye.

AM: Oo xaduudka in yar u jirta wax yar bay u jirtaa 29 kiiloo mitir Caasimada Botswana.

AY: Haa.

AM: 20 kiiloo mitir bay u jirtaa xaduudka wax yar bay u jirtaa.

AY: Waa gartay.

AM: South Afrika. Halkii baanu tagnay, Kahabariini baanu tagnay niman Soomaali ah oo waxaa kira dee taariikhda oo dhan baanu sii haynaa sidii bug taariikheed aanu akhrinayno.

AY: Waa yahay.

AM: Nin reer Buuhoodle ah.

AY: Haa.

AM: Baa qarni hore meesha yimid.

AY: Haye.

AM: Caruur Hindi ah buu ku dhalay, gabar Hindiyad ah buu guursaday, dad tijaar ah oo lacag leh weeye.

AY: Waa gartay.

AM: Waa maqalnay aniga iy Xassan ba waa nagu duuban tahay.

AY: Waa gartay.

AM: Halkaasaanu higsanaynaa.

AY: Waa gartay.

AM: Waxaa analagu yiri waxaa u shaqeeya nin Ingineer Ciise la yiraahdoo Soomaali ah oo isagu Soomaali asal ah.

AY: Waa gartay.

AM: Oo isaguna reer Ceel Afweyn ah.

AY: Waa gartay.

AM: Ma gartay?

AY: Waa gartay.

AM: Ninkii Ciise baanu raadsanay. War Ciise xagee ka helnaa, ninkii baanu helnay. Wuxuu yiri niman yahow nimankii Hindida ahaa in dhow uma shaqeeynin markaa hadaad meelaad seexataan doonaysaan anaa idin kaxeeynaye ina keena.

AY: Hindi-Soomaaligii.

AM: Hindidii niman Soomaali aad ah ma aha buu yiri.

AY: Waa gartay.

AM: Dee barigii hore dadka waa caawin jireen laakiin iminka dadkii…

AY: Baa ka batay.

AM: Haa ma laha adugu dee nimankii asagiibaaba na casuumay.

AY: Waa gartay.

AM: Asaga ana kaxeeyey gurigiisii buu na geeyey niman Soomaali ah baan ugu tagnay oo gurigiisa jooga waxaa degan guriga waxay wada kireysteen nin kale oo maxaan ku iraahdaa reer Banaadir ah.

AY: Waa hagaag.

AM: Dadka gibil cadka ah.

AY: Haa, waxba cadaan keeda waa Banaadiri.

AM: Wuu joogaa.

AY: Halkuu joogaa isna.

AM: Halkan buu joogaa magaaladatan soo ma aad garan.

AY: Haa, kuwaasaanba u baahnahay in aan ka dabo tago.

AM: Haa.

AY: Haye.

AM: Ninkii oo isagu wuxuu u shaqeeyaa aabihii waa Borafosoor Jaamacada wax ka dhiga. Botswana.

AY: Waa hagaag ninka Barawaaniga ah.

AM: Haa.

AY: Waa gartay.

AM: Barawaani ama aha reer Xamar.

AY: Reer Xamar waa hagaag.

AM: Reer Waqooyigu maka yaqaanaan.

AY: Haahe.

AM: Soo ma aad arag.

AY: Iigu adkeeyoo.

AM: [qosol] Ninkii reer Xamarka ahaa iyo Ciise gurigiisii baanu tagnay waa nalagu soo dhaweeyey si gobonimo leh baa nalo caawiyey nin baa nalagu daray subaxi waxaa la yiri meel waxaa jirta meesha la iska dhiibo UN ta ah waar maxaad South Africa ka doonaysana waxa naf ah oo ay leedahay ma jirto halkaanaa laga dhargay tanaa la iska qaadaa.

AY: Gabigaba.

AM: Haa.

AY: Waa gartay.

AM: Qaxootiga wixii qaxooti ah ee magaaladan iska dhiiba UN taa markiiba dadka la kala

cararta Australia, Canada anagu akhbaartaas maba anaan hayn.

AY: Waa gartay.

AM: Oo maxaanu sameynaa?

AY: Haye.

AM: War Cliyoe wuu joogaa magaalada Minneapolis buu joogaa Cali.

AY: Ma isna?

AM: Haa.

AY: Yaa cajiib.

AM: Halkanaa la isugu wada yimid.

AY: Haye war meeshu dee waxay ku cadeynaysaa in aan cidi ka maqnayn.

AM: Minneapolis baa la wada yimid.

AY: Haye.

AM: War Caliyow nimankan kaxee.

AY: Waxaan gartay.

AM: Waxaad geysaa xafiiskii qaxootiga meesha laga qaabilo waxaa laga soo bilaabaa xafiiska nabad sugida.

AY: UNHCR ta.

AM: Maya waa in aad isa soo qortaa dowlada.

AY: Waxaa gartay.

AM: Dowladaa ku soo baaraysa marka hore.

AY: Mar ka hore.

AM: Haa.

AY: Waa gartay.

AM: Caligii baa na qaaday subaxii wuu na kaxeeyey meeshii buu na geeyey, waxaa nala yiri wareysi baa nalaga qaaday. Waxaa nala yiri maxaad ahaydoon oo wixii baan u sheegnay.

AY: Haye.

AM: Oo hadaad Soomaali tihiin maxaad dooonaysaan, qaxooti baanu doonaynaa in aan isu dhiibno, oo Kiinya maxaad isaga dhiibi waydeen.

AY: Waa gartay.

AM: [u/i] Maba aanu soo marin oo Muzambiig baanu soo marnay oo doon ku nimid, ileyn Soomaaliya iyo Muzanbiig cidu u ma dhaxeyso aan ahayn badda.

AY: Haye.

AM: Muzanbiig maxaad isaga dhiibi waydeen?

AY: Haye.

AM: Een waxba aabahay qoyskayaga.

AY: Haa.

AM: Ayaa reer boqortooyo ahaayoo.

AY: Haa.

AM: In nalaga daba yimaado oo balaayo nagu dhacdo.

AY: Haa.

AM: Oo dad waxaanu nahay fakad ah.

AY: Haye.

AM: Dowladu wixii bay akhrisatay, waxaa la yiri nimankan amaankoodu waa khatar.

AY: Gabigaba.

AM: [qosol] Af libaax baanu galnay.

AY: [qosol]

AM: Nimankan yiri Muzanbiig ku nabad geli mayno.

AY: Haa.

AM: Oo boqortooyo iyo waxbaa jira.

AY: Haa.

AM: Nimankaas meel amaan ah ha la geeyo.

AY: Gabigaba. [qosol]

AM: Haa.

AY: [qosol] Haye.

AM: Xagee u badbaado ah baa la yiri.

AY: Haa.

AM: Meel xiran oo xabsi ah baa nala geeyey. [qosol]

AY: Allaa kariim.

AM: Xabsi. [qosol]

AY: Haa.

AM: Baa ooda na lagaga qaaday aniga Xassan baa nahay.

AY: Ileyn waa la idin ilaalinayaaye.

AM: Waa nala ilaalinayaa askar baa nalagu darayoo xagee nala geynayaa baan niri meel qasri ah oo la idiin diyaariyey.

AY: Haa.

AM: Askartu been bay noo sheegeen baanu idin geynaynaa.

AY: Haa.

AM: Waa garanay waa soo baxnay xabsi baa nala geeyey.

AY: Xabsi xabsi ah.

AM: Xabsi xabsi ah baa afka na loogaga guray.

AY: Haye.

AM: Waa nala baaray lacagtii iyo wixii baa na laga reebay. Xabsigii markaan soo galnay waxaa nala siiyey ninkayagiiba labo buste oo cusub.

AY: Haye.

AM: Oo cusub iyo barkin.

AY: Waa gartay.

AM: Meeshii baanu soo galnay xabsigii markii la furay albaabkii baa na lagu oriyey [u/i]. Zimbabwe baa ka buuxda mukeeri mukeeri bay yiraahdaan qaxootiga.

AY: Qaxooti kaliya ma aha, dambiileyaal qaxooti cid walbaa meesha la isku daray.

AY: Waa gartay.

AM: Dadkii o dhan waa la nagu oriyey waa nala handaday marka waanu sidii wax shahiid oo kale ah.

AY: Haa.

AM: Labo iskooba oo halkaa yaal yaalay intaanu qaadanay.

AY: Uh-uuh.

AM: Allaahu-Akbar, Allaahu-Akbar, waa la kala jeesanay.

AY: Haye.

AM: Bustayaashaa la doonayaa in na laga xoogo.

AY: Alla!

AM: Allaahu-Akbar, Allaahu-Akbartii baa nin kamaandoos ah oo ka yimi Malaawi Oo Saldiino la yiraahdo Xassan Saldiino. Waa nin laga baqo oo cawaandi ah. Maxaad ka rabtaan buu yiri candhuufta naga dhacaysa iyo ushaan aniga iyo ninkaasi ganayno dadkii gacantaanaan isula tagine waa na laga shakiyey oo waxaa la yiri nimankaani ma wax waalan baa. Saldiinaa ma ka xeeyey wuxuu yiri ninkaa la hadla labadaa nin…

AY: Haa.

AM: Ninkii xagooda soo eega qoortaan saa u jabinayaa saasaa naloogu sheexeyey waa la ka cararay.

AY: Woow!

AM: Saldiino wuxuu na geeye qolkiisii oo deganaa wuxuu yiri halkan dhigta bustayaasha.

AY: Waa gartay.

AM: Sariiro ma leh.

AY: Haa.

AM: Dhulkaa la dhiganyaa shamiitada labadiina halkaa dhinacayga dega agtiisaanu degnay waxa cabitaanu yaala, waa nin loo keeno wuxuu wasaarad wuxuu ka soo cararay odaygii Baandha markaa ragii komaandooska ahaayee ee dowladu raadinaysay.

AY: Haa.

AM: Oo inqilaab intay dambceen inay sameeyaan oo fakaday.

AY: Haa, weeyaan.

AM: Oo meesha sidayadoo kale la so geliyey buu ahaa.

AY: Haa.

AM: Saldiino waxaa jooga niman South Africa aan ah oo Muslim ahoo Abu-Bakar iyo Rooti-Bagaati la yiraaahdo.

AY: Haye

AM: Oo dad soo laayey South Africa Bangiyada dhici jirey oo laga baqayo dadkoo dhami ka baqayo.

AY: Oo meesha ku xirxiran.

AM: Kuwii baan u is baranay salaadaanu tukunaa 14 qof baa soo Muslimay.

AY: Intaad ku jirteen?

AM: Haa, intaanu halkaa yar joognay diintii sidii Manaasmoojadii aan ku soo tababaranay.

AY: Haa.

AM: Tanzaaniyadii sidii oo kale baanu waxaanu bilownay wacdi aan dadka wax u sheegno diintiinii dee waad arkaysaan diintii Masiixigay ku wada jireen.

AY: Waa gartay.

AM: Maalintii ciidii labo saf baanu ku tukanay awal sedex bay ahaayeen Abu-Bakar.

AY: Imisaad ku joogteen?

AM: Markaa ilaa iyo afar bilood baanu joognaa.

AY: Waa gartay, meeshaba afar bilood baad ku jirtaan?

AM: Afar bilood ciideedii labo saf baanu ku tukanay afar nina waanu ugu nimid. Waxaa laga yaabay labadan nine e yar yare e caatada ah ee xabsiga dhan u babac dhigay wax waalan iyo wax miyir qaba iyo Allaahu Akbartii iyo inikaa aanaan waligayo arag ee noo soo gurmaday iyo nimankii South Africa aan ka ahaa ee yimid baa la yiri war waxaanaaba wacani ma Gaangis baa kuwakani. Diintii bay soo galeen maalin walba mid baa ashahaadada loo qabanayaa. War adigu waanan waxba sheeko kugu daalinine markaanu dhowr bilood meeshi ku jirnay baa waxaa nalo gudbiyey meel kale oo qaxootiga ah. Wixii waan dacawoonay markaa codsi Ameerika ah meeshaan ku buuxinay.

AY: Haa.

AM: Iyagaa no osoo diroo waxaa la yiri niman noocaas ah yaa halkaa ku jira.

AY: Waa gartay.

AM: Wax Soomaali ah nalama joogaan markaa anaga.

AY: Waa gartay.

AM: Dhowr nin oo kale oo Soomaali ah oo meesha kale ku jira.

AY: Haa.

AM: Xerada iska caadiga ah baa joogay. Mayee waa kuu soo sheeko dhaafaye halkii markii nalaga saari waayey ayaan waxaanu bilownay waxaa joogtay Ugaandha badan oo Muslima ah baa timid, waxaanu bilownay in aan cunada diidno, inaan cuntada ka soono. Macnaha meesha waxa na loogu hayo ma rabnee UN ta ha nala geeyo, anaga oo ilaa 8 meelahaas ah labadayada marka Saldiino wuu baxayaa Mareykankaa wixii u dhameeyey.

AY: Haa.

AM: Ayaamo yar baa u haray.

AY: Waa gartay.

AM: Ugaandhayskii kuwo soo Muslimay iyo kuwo markoodii hore Muslim ahaa bay isugu jiraan.

AY: Uh-uuh.

AM: 8 deed anagoo ah baa niri aan cuntada ka soono.

AY: Waa gartay.

AM: Cunto ka soomid baanu sameynay. Cuntadii baanu ka soonay maalintii koowwad juuq nalooma oran.

AY: Uh-uuh.

AM: Tiina labaad na looma oran maalin sedexaadii ayaa Xassan la qaaday waxaa la geeyey mel kale oo la rabo in lagu khasbo in uu cuno cuntada, khasab lagu cunsiiyo.

AY: Waa gartay.

AM: Wuu diiday candhuuftii wixii ay afka ugu rideen buu indhaha kaga tufay sarkaalkii sitay oo gaashaanle ah.

AY: Waa gartay.

AM: Markaasaa la yiri waxaani waa wax cawaan ah aniga iyo kuwiii kale ee Ugaandhayska ahaana.

AY: Haa.

AM: Habeenkii ku xigay baa nalaga daba geeyey.

AY: Waa gartay.

AM: Waa meel cisbitaal ahaoo ay leeyihiin dowladu.

AY: Waa gartay.

AM: Si walba waa la yeelay si walba waa la yeelay, waxaa jooga magaalada nin reer Hargeysa ah.

AY: Uh-uuh.

AM: Oo Qaranada Midoobay ka u shaqeeya oo Xirsi Dheere la yiraahdo, Cabdiraxmaan Xirsi baa la yiraahdaa, wuu noogu yimaadaa meesha khudrad buu noo keenaa Tufaax buu noo keenaa wax kasta wuu naga war hayaa.

AY: Waa gartay.

AM: Cali, Caliga halkan joogaa wuu noo yimaadaa habro cadaan ah oo Mareykan ah oo meesha baa noo yimaada.

AY: Waa gartay.

AM: Oo uu soo kaxeeyaa.

AY: Gartay.

AM: Waa nalagu so booqdaa.

AY: Waa gartay.

AM: Een ninkii kale ee aan kuu sheegayey ee muxuu ahaa Ciise Ingineerkii.

AY: Haa.

AM: Waa no yimaadaa si walba waa la yeelaye markii meeshii nala geeyey ee aan diidnay in aan wax cuno Ugaandhayskii oo dhan waa cuneen maalin afraadii.

AY: Waa gartay.

AM: Aniga iyo Xassan baa nala kari waayey.

AY: Waa gartay. Waxba idin kama dagaan?

AM: Marka Xassan iyo Cabdiraxmaan waa isku qoys.

AY: Waa gartay.

AM: Waa is xigaan.

AY: Waa gartay.

AM: Waa na loogu yeeray, Candi raxmaanku waa madax ahoo gaari Land Cruiser ah oo qurux badan watoo oo VX noocii markaa ugu dambeeyey ah askartu waa yaabtaa.

AY: Waa gartay.

AM: War nimankan waxa loo imanaayo waa dad khatar ah waaye.

AY: Waa gartay.

AM: [qosol] Cabdiraxmaan baa la hadloo wuxu yiri iska cun waan kuu dhamaynayaa waxaaga UN ta anaa la hadlaya adigu yaah waa intaan aniga la I keenin.

AY: Haa.

AM: Wuu diiday saaxiibkay iyo anigu isku talaan nahay bu yiri, afkaa galin may walay iga tahay.

AY: Wax idin ka dagay markaa ma biyaad cabtaan mise?

AM: Biyana ma aanaan cabin.

AY: Waana maalintii afraad?

AM: Haa, waxaa nala geeyey dhaqtarkii baa la iigu geeyey. Ugaandhayskii la soo wada celi markay cuneen, waa aniga iyo Xassan oo qura.

AY: Waa gartay.

AM: Waa nala qaaday waxaa nala sii geeyey cisbitaalkii weynaa, cisbitaalka weyn…

AY: Haa.

AM: Ee magaalada ugu weynaa baa nala geeyey aniga iyo isagii 18 maalmood afkaa waxba ma anaan gelin.

AY: 18 maalmood.

AM: 18 cisho.

AY: Labadiinuba.

AM: Faleembaa laakiin nagu rakibnayd.

AY: [u/i] Haye.

AM: Faleembadu hadii ay kugu rakiban tahay waligaa waxna noqon maysid, 60 cisho iyo baa lagu noolaadaa faleembada Cabdirixmaan ba anoo yimaada eeg kasta oo wuxuu nagu yiraahdaa ninyahow iska cuna hawshiina waa la dhameynayaa, ma jirtaanu niraahnaa ilaa ay UN tu timaado.

AY: Haa.

AM: Oo warqadahayaga la dhameeyo naagtii UN ta anoo timid tii haysatay naag ka timi Hiati, yaa.

AY: Haa.

AM: Oo cadaan ah waxooga dhiig madow ku yar jiro.

AY: Haa.

AM: Baa noo timaada Codsiyadiinii iyo wixiiba waa dhameeyey iyo aa naagtii adigu markii aywixii naga dhameysay oo ay tiri waa dhameynayaa wixiinii maalintaasaan cunay. Xassan maalin walba been baa loo geeyaa labo qol baanu kala joognaa ma og tahay.

AY: Haye.

AY: Saaxiib kaa waa cunaye, cun.

AY: Haye.

AM: Ii geeya ayuu yiraahdaa.

AY: [qosol]

AM: [qosol] Waa nala khiyaamayaan.

AY: [qosol] Xagaad ku ogaateena inaad tiraahdaan caynkaa? Xaguu ku ogaaday ileyn waa siyaasadaha ay dadku sameeyaan.

AM: Waa iska garanayaa.

AY: Ii geeya.

AM: Haa Mar telefoonkaa lagu xirayaa Cabdiraxmaan iyo wixii Soomaalida dhowr kaa nin weeyee.

AY: Haahe.

AM: Adigu calaa kuli iyo xaal yaanan sheeko kugu daaline maalintii 18 naad.

AY: Haa.

AM: Ee gabadhi UN ku noogu timid ee wixii meel walb ka dhaceen ee dowladii ogaatay.

AY: Haa.

AM: Baani niri hada bas weeye mar hadii dowladii UN tii hawshayadii gacanta ku hayso.

AY: Haa.

AM: Bas waa cunaynaa, waa cunay waa nala kaxeeyey xero qaxooti baa nalo gudbiyey oo waxaa nala yiri nimankan meesha ha laga fogeeyo, tuulo fog oo Francistown la sii dhaafayo.

AY: Haa.

AM: Baa nala geeyey.

AY: Waa gartay.

AM: Xeradu meel lagu noolaan karo ma aha.

AY: Uh-uuh.

AM: Halkaa ku sugaa nala yiri ma og tahay, tobobaad intaanaan joogin baanu soo baxsanay.

AY: Bal dadkaa…

AM: Labo qol baa nala siiyey aniga iyo asagii oo daar ah.

AY: Haye.

AM: Oo xerada ah xeradu waa daaro.

AY: Haye.

AM: Waa qolal yar yar.

AY: Haye. [qosol]

AM: War heedhe Xassan dee waxaanu u soconay xeradan yar ma aheyne baanu is niri.

AY: Hee.

AM: Waa dee Axmadow halkani meel ma aha buu yiri.

AY: [qosol] Waa nin bahashu ku yare [u/i].

AM: Haa, adigu calaa ku iyo xaal [qosol] soo baxsanay.

AY: Haye.

AM: Taakhisoonti Cali habrihi gaalada ahaa naagihii nooga keeni jiray.

AY: Haa.

AM: Baanu nimid.

AY: Haye.

AM: Kuwii baan na siiyey meelo aanu seexano oo hoy ah.

AY: Haye.

AM: Dee halkii baanu ka soo baxnay.

AY: Halkii intay idin ku qaadatay markaa in inaad soo baxdaan?

AM: Adigu ilaa sanad waa ku dhadhawayd intaanu joognay Botswana.

AY: Cajiib markaa Marekan baad u soo baxdeen?

AM: Haa, Fargo.

AY: Fargo baad toos u timid?

AM: Haa, Cali isa soo raacnay.

AY: Haye, sidii baad u wada socoteen.

AM: Caligii na geeyey meesha.

AY: Haa.

AM: Ee maalintii nala xirayey isku diyaarad baanu saarnayn.

AY: Gabigaba.

AM: Haa, hawshiisu waa dhadhawayd barigaa kow dheh.

AY: Haye.

AM: Isku diyaarad baanu soo raacnay een markaa meeshi ka nimi, halkan waa so arkay ee adigu halkan aakhirkii waxaa ii soo raray qoyskayga walaahay iyo aabahay iyo dadkii o dhan baa yimid. Dadkii oo dhan baa yimi Fargo ayey cabaar joogeeyn ka dibna halan bay u soo guureen.

AY: Markaasaad adna ka daba timid?

AM: Haa dee qoysku inuu isu yimaado dee weeye.

AY: Waa hagaag.

AM: Waxaa markaa u shaqeeynaayey Luthern Social Services ka wax badan xagaa Fargo.

AY: Markaa noloshii aad soo martay baynu soo jibaaxnay laakiin intii een iyadu laftigeedu dee taasaanuba la baaxaa degaysay oo halw weyn ahayd, laakiin intaan doonayo in aan iyada laftigeeda dib ugu noqdaa waxay ahayd gabayaa baa tahay waliba Soomaalida intee kale ka yare duwan oo adigu waxaad leedahay takhasus ama xeerar kuu gooni ah.

AM: Uh-uuh.

AY: Een qadiyadaha ma laha waxa Ingiriis ta lagu yiraahdo "Cadaalada iyo Sinaanta Bulshada."

AM: Uh-uuh.

AY: Af Somaaliga waaba ay ku dabacasan tahayoo waxaan u malaynayaa baad adigu jidkaagu yahay.

AM: Uh-uuh.

AY: Goormaad horta gabayga bilowday oo aad aragtay in aad gabyi karaysid? Maase kuu sahlay baad u malaynaysaa?

AM: Horta nin yahow gabayga ama waxa maansada la yiraahdo een anoo yar baan wax iska yar yar oran jirey.

AY: Baad wax iska ororan jirtay?

AM: Oo caruur ah.

AY: Haa, baad yare.

AM: Wixiiba, wax yar yar baad arkaysaa caruurnimada isku aadaya.

AY: Haa

AM: Oo isku beegmaya.

AY: Haa.

AM: Markaa iney macne yare sameynayaan laakiin aad ugan aanan…

AY: Dadaali jirin.

AM: Dadaali jirin, waxba macne ah iima sameynayn.

AY: Haye.

AM: Laakiin nin yahow waxaa iga keenay badankiisa.

AY: Uh-uuh.

AM: Dagaalka sokeeye, murugada ma aragtay.

AY: Haa.

AM: Barigii aan joogay Tanzaaniya.

AY: Haa.

AM: Waa kii Cali Mahdi iyo Caydiid is dilayeen.

AY: Haa.

AM: Markaan idaacada dhageysto.

AY: Ma BBC daa dhageysan jirtay.

AM: Ilmaa isku soo kay taagi jirtay.

AY: Waa gartay.

AM: Qiiro Ilaahow dadkaa kala bixi.

AY: Kala badbaadi.

AM: Haa.

AY: Haa.

AM: Markaad gudaha ku jirto iyo miarkaad dibada joogto dareenkaagu isku mid ma aha, markaad gudaha ku jirto waxaad tahay nin foono ku dhex jira isma ogid.

AY: Haa.

AM: Damiirkaagu ma jiro laakiin markaad banaanka uga baxdo oo aad meel gooni ah tagto oo aad dad kale u tago.

AY: Haa.

AM: Waxaad arkaysaa waxaagii oo is cunaya.

AY: Waa gartay.

AM: Markaasaad iska ololaysaa oo gubanaysaa.

AY: Waa gartay.

AM: Markaa waxyaabo yar yar oo dib u heshiisiin ah baan isku aa aadiyey laakiin wax weyn ama ahayn.

AY: Waa gartay.

AM: Badankeedu klaakiin markii aan Jaamacada dhiganeyey.

AY: Haa.

AM: Oo Fargo joogay ayey u badnayd markaan ogaaday in aan si fiican wax u alifi karo. Oo aan wax isku duba ridi karo.

AY: Haa.

AM: Haa.

AY: Een markaa gabayo kale oo dee ragii gabayahanada ahaa markaaguu hore miyaad ku wanaagsanayd oo gabayadooda miyaad dhuuxi jirtay? Mise mar kaliya miyaad iska doob dilaacsatay? Soomaaliga aan u jilciyee hadii cid kale oo aan Soomaaligaa garanaynin ay jirto

mise mar kaliyaad is aragtay adigoo macnaha dee tadawirkaa aad soo martid talaabo talaabadaa aad oo martide.

AM: Haa.

AY: Ma adigoon u malaynaynin inaad meelan qalinka ka soo qalinka la raacday bay awoodani ku muuqatay mise waxaad u malaynaysaa in gabayo kale oo fara badani ay madaxaaga ku jireen?

AM: Nin yahow waxay u badan tahay horta aniga aabahay ma gabyi jirin.

AY: Waa gartay.

AM: Qoyskayaga xaga aabahay.

AY: Haa.

AM: Wax gabay ahi ma jirin.

AY: Waa gartay.

AM: Wax geeraara iyo wax buraanbura ma leh.

AY: Waa gartay.

AM: [qosol] Kow dheh.

AY: Waa gartay.

AM: Hooyaday Allaha u naxariistee iyadaa wax xoogaa caruurta oo kale sida loogu heesayo oo kale.

AY: Haa.

AM: Iyo marka ay tusayso waxyaabaha ay dhibsanayso.

AY: Haa.

AM: Xoogaayo yar yar bay sameyn jirtay soo ma aad garan?

AY: Waa gartay.

AM: Anigu markaan iskuulka dhiganayey gabayada xafidkooda waanu ku tartami jirnay caruurnimadii.

AY: Waa gartay.

AM: Yaah.

AY: Gabayadii iskuulka.

AM: Gabayadii iskuulka ma aragtay.

AY: Haa.

AM: Ka soo bixid waayadii la oran jirey ka soo baxa, waan ku wanaagsanaa laakiin wax badan oo kale oo iiga horeeyey oo gabayo ahi ma aanay jirin. Mar walba af Soomaaligu miyiga waan tagay oo mar labo sedex goor oo iskuulka la xiray wax walba waan ka soo bartay dhirtii xoolihii nooc walba waan bartay. Waxaan u malaynaa taas laftigeedu iney iga caawisay.

AY: Af Soomaaliga laakiin.

AM: Haa.

AY: Anigu waxaan u haystaa in aad af Soomaaliga igaga wanaagsana tahay miyina anigu waa ku koray adigu labo sedex jeer baa tagnaye. Ahmiyada ku siisay miyiga in aad een markii aad tagtay. Aad qabatid oo aad wax ka kororsatid, ma mid kugu jirtay oo aad markaa xasuusan tahay baa mise waa mid adiga oo aadan ogeyn kugu duxday?

AM: Horta miyiga markii aan dugsiga are dhiganaynay ayaa iigu horeeysay.

AY: Waa gartay.

AM: Waxaan suugaan la yiraahdo xoogeedu waxay ka timaadaa waa miyiga.

AY: Haa.

AM: Qofku hadii uu reer magaal yahay waxaa laga yaabaa in kalmadaha eray bixintu qaar badani dhibayaan.

AY: Haa.

AM: Anigu eray badan erayo badan badan ayaan miyiga ka soo kororsaday markaan tagay.

AY: Oo aad markaa ogeyd iney kuu kordheen.

AM: Dee dhirtoo kale waxba kamaan aqoon.

AY: Dhirta aniguba ilaa iyo imanka waxba kama aqaani.

AM: Haa mida kale markaad dhulka hawd ka ah markaad tagto.

AY: Dhirtii oo dhan baa yaacsan.

AM: Nooc walba ayaa mirihii baa waxay kala yihiin Dhafaruur, Hohob, Yicib, Toon, een Xangeenyo, Murcanyo, Xamakaa, Carab lo'aad. Xataa ma tirin kartid inta wax ee dhulkeena laga helo oo la cuno. Marooro, Gacayr, qofku markuu waxaas oo dhan so barto.

AY: Haa.

AM: Dhirta bartoo cawska bartoo, dadka bartoo xoolaha bartoo reer magaalku in yar buu isku celceliyaa.

AY: Waxaan ka baqsanahay in waxaasi in dhirtii aysan hada la ka harin intaas markaad tiraahdid caloosha meel baa I xanuunaysoo waxaan leeyahay dhirtaa waxba kama noola.

AM: Haa markaa reer magaalku in yar buu isku celceliyaa nolol maalmeedka intay ku wada hadlaan.

AY: Haa, haa, haa.

AM: Laakiin reer miyigu wuxuu hayaa dulucdii af Soomaaliga xoogiisu halkaasuu yaalaa.

AY: Haa, waan gartay.

AM: Markaa, waxaan u malaynayaa waxaan filayaa inay tahay in taa laftigeedu ay waxoogaa ii saamaxday laakiin waxaa ka sii weyn waxa aad niyada u hayso.

AY: Waxaad niyada aad u hayso baad leedahay.

AM: Niyada aad u hayso dadkan markaa waxaad baranaysaa dee wax walbaa waxay leeyihiin miisaan la saaro kalmadii in ay kaa kala dheeraato waad baranaysaa markaad akhrido-akhrido, adoon ogayn in aad baratay baa baranaysaa.

AY: Haa, duni door ah ayeynu jibaaxnay markaa dhabtii labo saac iyo dheeraad baynu hada hadlaynay, mana dhawin laakiin waa iska soo gaba gabaynaynaa labo kalmadood markaanu ku soo gabagabayno.

AM: Uh-uuh.

AY: Ummada Soomaalida ah ee imanka magaaladan degan, magaalada maxaaad oran lahayd anigoo Gobolkan Minnesota la yiraahdo.

AM: Uh-uuh.

AY: Gobolku ma isagaa ina caawiyey? Mise caawima tiilay waynu iska hoobsanaynaa Maxaynu se wax ma ku soo kordhinay anagu baad u malayn?

AM: Taa intaanan ka jawaabin, su'aashii aad i waydiisay ee ka horeeysay. Waxaan iloobay waxaan aad "Cadaalad Bulshadeedka" aad ku sheegay.

AY: Haa, haa, oh taasaanu ilownay, dib ugu noqo taa.

AM: Cadaalada Bulshada.

AY: Haa.

AM: Anigu sidayda gabayada waayo waa taqaanaa qaar waxaa weeye qabiilkayagaa qabiilkiina ka adag, intaas oo nin baanu ka dilnay ee cirkaanu taabanay.

AY: Haa.

AM: Waa faan qabiil.

AY: Haye.

AM: Waa faan iyo han weynaan iyo qab weeye.

AY: Haa.

AM: Aniga.

AY: Haa.

AM: Halkaa saad sheegtay ma galo.

AY: Waa gartay.

AM: Qofka liita.

AY: Baa u hiilisaa.

AM: Qofka liita.

AY: Baad u hadashaa.

AM: Haa.

AY: Waa gartay, halkaad ka keentay ma garanaysaa?

AM: Een Midgaanka dee waadigii ogayd intii aanu soo marnay.

AY: Haa.

AM: Kalmadii ma aragtay quursigu qiil ma leeyahay?

AY: Haa.

AM: Iyo tii adigu qormooyinkaad qortay. Wixii waanagii isla wada ogeyn.

AY: Haa.

AM: Een dadka lagada tirade badan yahay.

AY: Haa.

AM: Jarrerta, Barawaaniga, Xaquuqda haweenka.

AY: Curyaamiinta.

AM: Curyaamiinta, indhoolaha, naafada.

AY: Haa.

AM: Dadka bulshadu xaqirto.

AY: Haa.

AM: Baan anigu u doodaa.

AY: Waan gartay, xagaad ka keentay aad u malayanaysaa in ay kaa soo raadcay taasi?

AM: Waxaan filyaa ninyahow barigaanu Soomaaliya joognay.

AY: Uh-uuh.

AM: Waxaan u malaynayaa waxaa laga yaabaa in aad had aka horna kuu sheegay.

AY: Uh-uuh.

AM: Laascaanood markii aynu joognay, waxaa nala geeyey tababarka meel la oran jirey

Dalyare.

AY: Uh-uuh.

AM: Waxaan ahaa 17 jir, waxaan saaxiib la ahaa waxa meesha wada joogaa waa wixii xaafadayada ka wada yimid.

AY: Uh-uuh.

AM: Jareerta nimanka timaha adag ee jareerta ah.

AY: Uh-uuh.

AM: Iyo dadka noocaas oo kale ah.

AY: Haa.

AM: Baan saaxiib la ahaa.

AY: Waan gartay.

AM: Buuhoodle markii nala geeyey dadka waxaan inan Cabdinuur la yiraahdo.

AY: Haa.

AM: Oo reer Ceel-buur ah.

AY: Haa.

AM: Baa guurowga aad aragtay i baray oon saaxiib la ahaa.

AY: Waa gartay.

AM: Een maxaan ku iraahdaa waligay, Xamar markii aan waxbarashada ku jiray waxaan tagi jirey Digfeer dhabarkiisa.

AY: Uh-uuh.

AM: Waxaa jirtay meel la yiraahdo meesha Eylaha.

AY: Haa.

AM: Dadka Eylaha ah ayaa deganaa ee masaakiinta ah.

AY: Waa gartay.

AM: Waxaan jeclaa inaan wax u qabto anigoo arday ah, nin Cabdirashiid Geel-Qaadla yiraahdo oo imanka Chicago jooga.

AY: Haa.

AM: Baanu saaxiin ahaynoo is raaci jirnay, waa soo diiwaan gelin jirnay ina anau hay'adaha iyo dowlada iyo wuxuu u galaan galno.

AY: Waa gartay.

AM: Oo u hadalno dadkan in la caawiyo.

AY: Waa gartay.

AM: Dadkan nala midka ah ee walaalaheena ee maanta baahan Difeer dabadeeda wali sagaarada soo dabanaya ee aan guryaha deganayn.

AY: Waa gartay.

AM: Waxay degan yihiin maryo la isa saaray.

AY: Waa gartay.

AM: Marka ninyahow waxaan u malaynayaa inaan say ugu soo gashay garan maayee.

AY: Haa.

AM: Kuwaasaan ka yare xasuustaa waagaa.

AY: Aan in yar ka bayro sheeekhadan markaa aynu haysano.

AM: Haa.

AY: Dadkii aynu oran jirney Eyley, wax ma ka hareen tallow xageey ku dambeeyeeen? Kolay dee wax ka hare baa laga yaabaa.

AM: Kolayba wax ka hare saan filayo aniga Xamar waxaa iigu dambeysay.

AY: Xili dambe.

AM: '91.

AY: Waa gartay.

AM: Ma garanayo walaahi xaalkoodu wuxuu ku dambeeyey laakiin dad aad iyo aad u dulmanoo aan waxba loo ogolayn.

AY: Bay ahaayeen.

AM: Ninka Xamar jooga ee sagaara doonanaya intuu miyiga aado ka waran isagoo Soomaaliya wadankiisii jooga.

AY: Walaahi [u/i].

AM: Haa.

AY: Een hadaba hadii aan u soo noqono maxay magaaladatani Gobolkani waynu ku badanahay.

AM: Haye.

AY: Hadaan su'aashii yare bedbedelo maxaanu maxay kula tahay Gobolkan maxaad nagu qiyaasi lahayd xaalkeenu xaguu marayaa? Saynu nahay?

AM: Soomaalida waxaa tiri ma inagaa nayla caawiyey mise caawimo meesha taalay baynu helnay?

AY: Haa, su'aashaasay ahayd su'aashii hore, haa.

AM: Ninyahow markaan dhinac walba ka istaago, Minnesota meelaha Mareykanka ugu qabow bay ku jirtaa, marka dul weynaha la eego.

AY: Waa gartay.

AM: Intaan dee adigu ilaa Fargo halkan waa isku mid uun.

AY: Waxba isma dhaamaan.

AM: Haa, een dadlka halkan degan horta waxay u badan yihiin dad Iskaandaneefiyaan ah badankoodu asalkoodu.

AY: Run.

AM: Dadka Iskaandaneefiyaanka ahina markooda horeba waa dad naxariis badan xataa kuwa xagaa iyo Yurub jooga ee dad af gaaban oo midab takoorku ku yar yahay oo dabacsan oo naxariis leh weeye.

AY: Uh-uh.

AM: Taa kaliya hadaba inama keenin, *Minnesota Nice* kaliya.

AY: Inama keenin.

AM: Inama keenin.

AY: Uh-uh.

AM: Tanzaaniya sidoo kale waa wacan tahay. Iyadaba waa joogi karay.

AY: Haa.

AM: [qosol] Yaah.

AY: Ma aad joogin waa gartay.

AM: Waxaa jirtay fursado shaqo.

AY: Shaqooyin.

AM: Haa, waadigii dee buuga ka qoray taas nin waliba kuu daba fadhiyaa Ahmed ow sidii dadku halkan ku yimid.

AY: Waa wacnaan lahow in ay saa tahay.

AM: Soomaalidu shaqo anigu shaqadii iigu horeeysay $4.25 seenti.

AY: Yaad ku bilowday.

AM: Yaan Fargo ku bilaabay.

AY: Hadana shirkadaad leedahay.

AM: Lacagta ugu yare e lagu shaqeeyn karo wadanka ayey ahayd kow dheh. Waxaanba la yaabanaaba.

AY: Haa.

AM: Adiga nin Mareykan ah maalintii ugu horeeysay ee aan meesha imi.

AY: Hee.

AM: Ninkii wadanka ku dhashay iyo adigu isku mushahaar baad qaadanaysaan hadaad isku xirfad tihiin.

AY: Haa.

AM: Dee Soomaaliya marka joornaalka la soo qorayo waxaa la qori jirey waa in uu Soomaali yahay waa inuu sidaa yahay.

AY: Haa.

AM: Laakiin xaquuq labada qof isku shaqo qaban karaa waa in ay isku mushaar qaataan oo dowladu qarartay.

AY: Haa.

AM: Waxyaabo badan baa ina caawiyey dad badan baa soo halgamay ee xaquuqda shacabka u soo halgamay madowgii soo dadaalay ha noqoto meeshan dadka waa la isla soo gaaray.

AY: Waa gartay.

AM: Fursadana waa jirtay.

AY: Waa gartay.

AM: Inaguna fursada waanu ka faa'iidaysanay.

AY: Waa gartay.

AM: Dadkuna dad wacan bay ahaayeen waa lakabyo badan oo is dul saran.

AY: Sheekadu saa uma fududeyn.

AM: Haa waa say aniga ila tahay.

AY: Een waad ku wanaagsan tahay s'aashaas waad sugtay. Waxaan kaloo ku dari lahaa, maxaad u malaynaysaa iminka ilaa 20 tameeyo sanno waynu joognay.

AM: Haa.

AY: Laga so bilaabo '93 dii.

AM: 21 sanno ayaan joognaa, haa.

AY: 20 sanno o dambe hadii aynu joogno… Maxaad u malaynaysaa in aan ku ekaanayno?

AM: Walaahi ninyahow waa su'aal fiican hadaan is iraaho horta Ilaahay baa og subxaanahu wa tacaalaa.

AY: Waa run.

AM: Soomaalida waxaa la eegaa kuwii ka sii horeeyey.

AY: Haa.

AM: London imisay joogeen.

AY: Waa gartay.

AM: Sawirka London.

AY: Haa.

AM: Oo dee qaadkaas yeynaan inagu cunin oo Ilaahayba inaga joojiyey.

AY: U malayn maayo inaa kuwaas [u/i] waa ka.

AM: [qosol] kow dheh iyagiina nin baa Ilaahay u soo dirayoo.

AY: Waa laga joojiyey.

AM: Waa laga joojiyey. [qosol]

AY: Haaye.

AM: Kow dheh dadkii Bad-maaxa ahaa ee London ku arkay.

AY: Haa.

AM: Ragii 40 sanno joogay barigaa iminka konton noqonaysa, Soomaalinimadiina kama tagin xaafadahoodii bayna degan yihiin.

AY: Haa.

AM: Caruurtoodu halkii bay ku dhasheen dee waxaan u malaynayaa Soomaalidu in ay sii ilbaxdo mooyaane.

AY: Haa.

AM: Sidii bay Soomaali u ahaanayaan. Ma u malaynayo iney lumayaan dadkani dad lumaya in kastoo barigii hore…

AY: Wax ma ku darsanayaa laakiin dadka kale oo wax ma la qaybsanaynaa.

AM: Haa, saan is leeyahay, hadeer baynu la qaybsanaa.

AY: Soo ma aha.

AM: Haa.

AY: Waa hagaag.

AM: Xiligan xaadirka ah isku mid ma aha barigii aan magaaladan soo degay.

AY: Haa.

AM: Eden Praire meelahaas in la dego Soomaalida dhib bay ku ahayd. Meel fog oo baas baa la degay, iminka waxaad helaysaa meesha ugu shisheeysa.

AY: Islaan hagoogan.

AM: Waabitan Soomaali degan baa helaysaa.

AY: Hagaag, hada waxaanu so gaarnay su'aal kale oo igu hartay ma jirtaan u malaynayaa laakiin adiga meel ku xantaynaysa meel ku taabanaysa maxaad ku dari lahayd?

AM: Waxa kaliya oon.

AY: Wax badani way jiraan.

AM: Wax kooban hadaan is iraa ku dar.

AY: Haa.

AM: Een ninyow Soomaalidu waa dad Muslim ah.

AY: Waa gartay.

AM: Waa dad isku af ah.

AY: Uh-uuh.

AM: Waa dad isku dhaqan ah.

AY: Uh-uuh.

AM: Waa dad isku diin ah.

AY: Uh-uuh.

AM: Wax walba waa isku mid.

AY: Waan gartay.

AM: Wax walba waa isku mid.

AY: Uh-uuh, taas waanu oran jirnay barigi hore laakiin dee hadeer cidina inaga rumeysan mayso dunida inteeda kale…

AM: Waxaa jira.

AY: Uh-uuh.

AM: Dad ay ugu badiso in Soomaalida la isku diro oo la is nabacysiiyo.

AY: Waa gartay.

AM: Qofka daneystaha ah ee isagu hawl gooni ah oo isaga u khaas ah oo uu is leeyahay waa ugu badisaa ama waa ku macaashaysaa wata.

AY: Haa.

AM: Qofkaa waa in aan la raacin, waa arkaysaa iminka inta Masaajid ee ku yaal asbuucii la soo dhaafay Kaniisad weyn baa St. Paul laga iibiyey.

AY: Waa gartay.

AM: Oo taraawiixda lagu tukanayaa caawa.

AY: Waa gartay.

AM: Soo ma aad garan. Maalin walba Masaajid cusub baa la furayaa.

AY: Haaheey.

AM: Dadkii beeshu intaa diinteedi iiyo waxeedii iyo dhaqankeedii iyadoo wadata.

AY: Uh-uuh.

AM: Ayaa hadana Maerykan nimadii iyo dadkii walaalahood ahaa ee ka soo horeeyey caawiyeyna abaal iyo lib bugu hayaan.

AY: Waa gartay.

AM: Marka waxaan jecelahay in aan anagu Soomaalinimadeenii aan isu soo dhawaano.

AY: Haa.

AM: Gacmaha is qabsano.

AY: Uh-uuh.

AM: Siyaasadii ina burburisay ee aynu xagii kaga nimid.

AY: Yee.

AM: Aanu faraha ka qaadno.

AY: Waa gartay.

AM: Danteena Soomaalinimadeena wixii diinteena iyo dhaqankeeda iyo dadnimadeenu ku badbaadayso halkan aynu nimid.

AY: Iyo dadka aynu halkan ugu nimid.

AM: Dadkaan halkan ugu nimidna saanu wax ula qabsan lahayn. Ayaan anigu kolayba ku dardaarmi lahaa.

AY: Waa sheeko wanaagsan waa hadak wanaagsan aad baad u mahadsan tahay. Halkaasaynu ku soo gabagabaynaynaa qodobkaasi wuxuu ahaa qodob wanaagsan.